SOMALI FEDERAL REPUBLIC

# BUUGGA DHAMMAYSTIRKA DOWLAD-DHISKA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI SOOMAALIYA

2025



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## Guddiga Farsamo ee Dhammaystirka Dowald-dhiska Waqooyi Bari

# BUUGGA DHAMMAYSTIRKA DOWLAD-DHISKA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI SOOMAALIYA

# Tusmada Buugga


TUSMADA BUUGGA ........ A

MAHADNAQA GUDDOOMIYAHA GUDDIGA ........ C

LIISKA ERAYADA GAABAN ........ E

GUUDMAR KOOBAN ........ F

CUTUBKA 1AAD: GOGOL-DHIG ........ 1

1.1 Hordhac ........ 1

1.2 Xaaladda Taariikheed ........ 1

1.3 Safarkii Ra'iisul Wasaaaraha ee Laascaanood ........ 2

1.4 Magacaabista Guddiga Farsamada ee Dhammaystirka Maamul-dhiska SSC-Khaatumo ........ 4

CUTUBKA 2AAD: WAJIGA 1AAD EE LA TASHIYADA IYO ISU SOO DHAWEYNTA DANEEYEYAASHA ........ 6

2.1 Hordhac ........ 6

2.2 Kulamada Daneeyeyaasha Dhammaystirka Maamulka SSC-Khaatumo ........ 7

2.3 Saamaynta Wadatashiyada Daneeyeyaasha Uu Ku Yeeshay Furitaanka Shirka ........ 16

CUTUBKA 3AAD: WAJIGA 2AAD EE SHIRWEYNAHA QARAN IYO SAMEYNTA & ANSIXINTA DASTUURKA ........ 17

3.1 Hordhac ........ 17

3.2 Shirwaynaha Dhammaystirka Dowlad Goboleedka SSC-Khaatumo ........ 17

3.3 Kulamada Guddiga ee Daneeyeyaasha Ergada Shirka ........ 21

3.4 Saamaynta Wadatashiyada Daneeyeyaasha uu Ku Yeeshay Shirka Ergada ........ 26

3.5 Waajibaadka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka & Guddiga Farsamo ........ 27

3.6 Ergada Shirka iyo Ansixinta Dastuurka ........ 32

3.7 Geeddi Socodkii Dastuur Yeelashada SSC-Khaatumo ........ 36

**CUTUBKA 4AAD: WAJIGA 3AAD EE XULISTA GOLAHA WAKIILLADA IYO DOORASHADA GUDDOONKA GOLAHA ........ 40**

4.1 Horudhac ........ 40

4.2 Magacaabista Guddiga Hubinta yo Ansixinta Xubnaha Golaha Wakillada ........ 40

5.1 Magacaabista Guddiga Doorashada Madaxwaynaha iyo Madaxwayne Ku-xigeenka ........ 59

5.2 Doorashada Madaxwaynaha iyo Madaxweyne Ku-Xigeenka Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari ........ 60

**CUTUBKA 5AAD: GUNAANAD IYO TALO-BIXIN ........ 66**

**LIFAAQYO/TIX-RAACYO ........ 68**

# Mahadnaqa Guddoomiyaha Guddiga



Aniga oo ku hadlaya magaca Guddiga waxa aan mahad ballaaran u celinayaa Garaaddada, isimada, iyo dhaqanka gobollada Sool, Sanaag iyo Buuhoodle oo qayb wayn ka qaatay soo xulitaankii ergadii shirweynaha, oo ahaa halbowleyaasha doodaha iyo go'aan qaadashada, isla markaana ansixiyey Dastuurka Maamul Goboleedka. Waxaa aniga iyo xubnaha guddigu aanaan marnaba hilmaami doonin garab istaaggii iyo doorkii ay odayaashii 33-da ahaa ee Maamul-dhiska SSC-Khaatumo iyo culimada Sool, Sanaag, iyo Buuhoodle ku taageereen dhammaystirka dowlad-dhiska Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari. Si taas la mid ah, waxa aan u mahadcelinaynaa Ciidanka Amniga doorkoodii mas'uuliyadda lahaa ee sugidda amniga iyo nabadgelyada shirka. Mahad sharaf leh waxa aan u celinayaa Warbaahinta Gudaha iyo dhalinyaradii firfircoonayd ee ka hawlgashay.

Waxaa xusid mudan booqashadii taariikhiga ahayd ee Mudane Xamza Cabdi Barre, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo shaqada guddiga u noqotay furaha dhib yareeya xaaladaha adkaada oo dhan, iyo taladii iyo tusaalayntii joogtada ahayd ee uu Ra'iisul Wasaaruhu la garab taagnaa guddiga, sidoo kale waxaan uga mahad celinayaa Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiintii taageerada uu u fidiyay guddiga.

Mahadcelin gaar ah waxa aan u celinayaa Hoggaamiyaha SSC-Khaatumo Cabdulqaadir Axmed Aw-Cali, oo si wayn noogu taageeray in aan hawlaha shaqo ee naloo igmaday an u fulinno si madaxbannaan oo waxtar leh. Taageerada, hoggaaminta iyo go'aanka Hoggaamiyaha SSC-Khaatumo waxa uu saldhig u noqday in Guddiga Farsamo hawgalkiisu uu si waxtar leh u hirgalo, la'aantiisna ay adkaan lahayd in si dhakhso ah loo fuliyo qorshaha Dhammaystirka Dowlad-dhiska Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari.

Waxa uu si saaxiibtinnimo leh oo qoto dheer ugu mahadcelinayaa Guddiga Qaban-qaabada Maamulka SSC-Khaatumo soo dhawayntoodii sharafta badnayd, martigalintoodii milgaha lahayd, iyo ka-warqabkoodii joogtada ahaa. Mahadcelin gaar ah waxa aan u celinayaa Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ee Dawlaad Goboleedka Waqooyi Bari Marwo Suhuur Faysal Barre, Wasiirka Wasaaradda Arrimaga Gudaha iyo Dib-u-heshiisiinta SSC-Khaatumo mudane Cabdisahal Maxamed Jaamac, Wasiirka Wasaaradda Amniga Mudane Ibraahim Jaamac Raygal, iyo Wasiirka Maaliyadda SSC- Khaatumo Mudane Cabdiqani Xuseen

Xaaji Hiirad garab istaagoodii, taageeradii dhinac walba ahayd, iyo fududeynta xiriirka aan la yeelanay qaybaha kala duwan ee shacabka Sool, Sanaag, iyo Buuhoodle.

Waxaan ku faraxsanahay in guusha Eebe keenay ka bacdi aan la shaqeeyay xubnaha guddigan oo ahaa kuwo shaqa yaqaan ah, firfircoon, oo si karti iyo daacadnimo leh u guttay waajibkii loo igmaday, la'aantoodna aanay suurta gasheen qabsoomidda hannaankii hufnaa ee aan ku dhisnay dawlad goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.

Ugu dambeyn, waxa aan Allaah (SW) uga mahad naqaynaa inuu si nabad ah oo la isla oggol yahay noogu dhammeeyay Dhammaystirka Dowlad-dhiska Dowlad goboleedka Waqooyi Bari. Waxaana Allaah uga baryaynaa shacabka Waqooyi Bari iyo shacabka Soomaaliyeedba inay ku naalloodaan Dowladnimo dhammaystiran iyo nabadgalyo.

Dr Axmednuur Sh. Maxamed Aw-Cabdi Uleex

Guddoomiyaha Guddiga Farsamo ee
Dhammaystirka Dawladdhiska SSC- Khaatumo

## Liiska Erayada Gaaban

| Liiska Erayada Gaaban | Waxa laga soo gaabiyay |
|---|---|
| **SSC-Khaatumo** | Sool, Sanaag, iyo Cayn - Khaatumo |
| **DFS** | Dowladda Federaalka Soomaaliya |
| **JFS** | Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya |
| **KMG** | Ku Meel Gaar |
| **NCC** | Golaha Wadatashiga Qaranka (National Consultative Council) |
| **DG** | Dowlad Goboleed |
| **CV** | Taariikh-nololeedka shaqo (Curriculum Vitae) |
| **CID** | Waaxda Baarista Dambiyada (Criminal Investigation Department) |
| **ToR** | Waajibaadka Shaqo (Terms of Reference) |
| **WAGF&D** | Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta |

## Guudmar Kooban

Buugga Dhammaystirka Dowlad-dhiska Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya ee 2025 waxa uu si faahfaahsan u qeexayaa geeddi-socodka iyo marxaladihii loo maray aasaaska maamulkan, oo ka kooban gobollada Sool, Sanaag, iyo Cayn (SSC). Geeddi-socodkan ayaa ahaa mid ay hormuud ka ahaayeen hoggaanka dhaqanka, siyaasiyiinta, iyo qeybaha kala duwan ee bulshada, iyadoo taageero ka helaya Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Ujeeddada ugu weyn ee aasaaska Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari waxay ahayd in dadka degaannadaas ay helaan maamul ay iyagu leeyihiin oo ka tarjumaya rabitaankooda, si loo soo afjaro sanado badan oo colaad iyo hubanti la'aan siyaasadeed ah.

Geeddi-socodka dhismaha maamulka cusub wuxuu ku yimid wadatashiyo iyo shirar ballaaran. Waxa ugu muhiimsanaa *Shirweynihii Ergada ee Dhammaystirka Maamul-dhiska* oo si rasmi ah u furmay *13-kii Luulyo 2025* magaalada Laascaanood. Shirweynahan waxaa ka soo qayb galay in ka badan *600 oo ergo* oo matalayay dhammaan beelaha iyo degaannada gobollada Sool, Sanaag, iyo Cayn. Dood iyo falanqayn dheer ka dib, *30-kii Luulyo 2025*, ergada oo tiradoodu ahayd *417 xubnood* ayaa cod aqlabiyad ah ku ansixiyay Dastuurka cusub ee Dowlad Goboleedka, iyadoo magaca maamulka loo ansixiyay "Waqooyi Bari Soomaaliya."

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa si weyn u taageertay dhismaha maamulkan, iyadoo u arkeysay tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhanka nabadda, midnimada, iyo xoojinta nidaamka federaalka ee dalka. Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka, iyo Dib-u-heshiisiinta ayaa si dhow ula shaqeysay guddigii farsamada ee loo xilsaaray dhammaystirka dowlad-dhiska, iyadoo fududeysay wadatashiyada iyo taageerada farsamo.

Geeddi-socodka ayaa waxa uu soo maray heerar kala duwan oo ay ka mid ahaayeen:

- **Wadatashiyo:** Kulamo ayaa lala yeeshay dhammaan daneeyayaasha siyaasadeed iyo kuwa bulshada si loo helo aragti mideysan.
- **Ansixinta Dastuurka:** *417* ergo ayaa 30-kii Luulyo 2025 shirweyne ballaaran ku ansixiyeen dastuurka uu yeeshay Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.
- **Doorashada Baarlamaanka**: *17-kii Agoosto 2025*, waxaa lagu dhawaaqay liiska rasmiga ah ee *83-da xubnood* ee Golaha Wakiillada ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari. Isla maalintaas ayaa la dhaariyay xildhibaannada.

- **Doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka:** *30kii Agoosto* 2025, Baarlamaanka cusub ayaa doortay madaxweynaha iyo madaxweyne ku-xigeenka maamulka.

Ugu dambayn, dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa si rasmi ah u aqoonsatay Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari, kaas oo noqday maamul goboleed buuxa oo ka tirsan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

# CUTUBKA 1aaD: GOGOL-DHIG

## 1.1 Hordhac

Cutubkani wuxuu gogol-xaar u yahay geeddi-socodka dowlad-dhiska oo dhan. Wuxuu ka hadlayaa xaaladdii taariikheed ee degaannada Sool, Sanaag, iyo Cayn (SSC-Khaatumo), iyo sidoo kale dadaalladii horseeday aasaaskii maamulkii Ku Meel Gaarka ahaa ee SSC-Khaatumo, kaas oo ay hormuud ka ahaayeen isimada iyo waxgaradka degaanka. Cutubku wuxuu si gaar ah u xusayaa aqoonsigii Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) ay siisay maamulkaas iyo booqashadii taariikhiga ahayd ee Ra'iisul Wasaare Xamse Cabdi Barre uu ku tagay Laascaanood bishii Abriil 2025.

Booqashadaas waxay dardar gelisay hannaanka, taasoo horseedday in 5-tii Luulyo 2025 la magacaabo Guddiga Farsamada ee Dhammaystirka Dowlad-dhiska si ay u hirgeliyaan wajiyada ugu dambeeya ee dhismaha dowlad goboleedka.

## 1.2 Xaaladda Taariikheed

05/01/2023dii, Garaaddada Sool iyo Buuhoodle ayaa dhisay Guddiga Aayo -katalinta SSC- Khaatumo oo maamulayay kacdoonkii ilaalinta midnimada dalka iyo dadka Soomaaliyeed ee ka curtay magaalada Laascaanood. Guddiga Aaya-katalinta SSC-Khaatumo waxa uu ahaa maamul ku meel gaar ah oo loo dhiidbay in uu ka dhabeeyo himilooyinka xornimo u dirirka iyo midaynta Ummadda Soomaaliyeed. Guddigu waxa uu waxbixinno iyo qaraaro badan ka soo saaray gabood-falladii ka dhacayay muddada 8da bilood ahayd magaalada Laascanood iyo nawaaxigeeda.




Waxaa magaalada Laascanood 28/01/2023 ilaa 05/02/2023 iskugu yimid shirwayne ay aayahooda uga tashanayeen dhammaan garaaddada, cuqaasha,

culumada, aqoonyahannada, haweenka, dhalinyarada iyo qaybaha kala duwan ee bulshada. Wada-hadal, wada-tashi iyo falanqayn qoto dheer ka dib, waxaa ka soo baxay in SSC-Khaatumo dad iyo dalba ay ka mid yihiin dhulwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ayna astaan u yihiin midnimada iyo wada-jirka ummadda Soomaaliyeed. Sidoo kale, shirwaynuhu waxaa lagu go'aamiyay inta la dhammaystirayo aayo-ka-tashiga degaannada SSC-Khatumo sida waafaqsan qodobka 49aad ee dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya in degaannada SSC-Khatumo ay hoos tagaan Xukuumadda Federaalka Soomaaliya muddo labo sano ah inta ay ku biirayso gobol kale si waafaqsan qodobka 48aad faqradiisa 2aad ee







dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

5tii agoosto 2023, Hoggaamiyaha SSC Khaatumo, Cabdiqaadir Axmed Aw-Cali (Firdhiye) ayaa loo doortay inuu hoggaamiyo maamulka ku-meelgaarka ah. Waxa uu Cabdiqaadir Axmed Cali (Firdhiye) codad 30 ah kaga guulaystay Bashiir Xaaji Cali "Jamaal", halkaas oo uu ku noqday Hoggaamiyihii ugu horeeyay oo ay toos u doortaan xildhibaanno la soo magacaabay. Xukuumadda uu hoggaaminanay Cabdiqaadir Axmed Cali (Firdhiye) waxaa la siiyay mas'uuliyad labo sano oo lagu dhammaystirayo maamulka SSC Khaatumo si ay u noqoto Dowlad xubin ka ah Dowladda Federaalka. Shuruudaha in ay noqoto Dowlad Xubin ka ah Dowladda Federaalka waxaa ugu waynaa in ay la midoobaan gobollada kale ee ka mid ah gobolladii jiray janaayo 1991.

## 1.3 Safarkii Ra'iisul Wasaaaraha ee Laascaanood

Ka dib latashiyo badan oo dhinacyo kala duwan ah, Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS Mudane Xamsa Cabdi Barre ayaa 12kii Abriil 2025 booqasho shaqo ku tagay magaalada Laascaanood iyo degaannada ku hareeraysan. Ra'iisul Wasaaruhu waxa uu u aqoonsaday SSC- Khaatumo maamul ku-meel gaar ah xaqna u leh inay ka qaybgalaan kulamada Golaha Wadatashiga Qaranka ayna muhiim tahay inay

dhammaystiraan shuruudaha ka mid noqoshada dowladdaha xubnaha ka ah Dowladda Federaaalka.





Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyada oo tixraacaysa go'aankii 6dii Febraayo 2023 ee Isimada Dhaqanka iyo Waxgaradka SSC- Khaatumo, go'aankii ay DFS ugu aqoonsatay Maamul Kumeel gaar ah 19kli Oktoobar 2023, wax ay xukuumaddu go'aansatay;

1. In DFS, Maamulka SSC-Khaatumo u agoonsatay Dowlad Goboleed. laguna dhammeystiro shirweynaha iyo heshiiska bulsho (Dastuurka)
2. In uu Maamulka SSC-Khaatumo xubin buuxda ka noqdo Golaha wadatashiga Qaranka (NCC).

3. In degaannada maamulka SSC-Khaatumo ay yihiin degaanno ka mid ah DFS, looguna yeeri karin degaanno lagu muransan yahay (disputed area).

Waxaana uu Mudane Ra'iisul Wasaare Xamsa Cabdi Bare faray hay'adaha DFS, Kuwa aan dowliga ahayn iyo saaxiibada Soomaaliya inay uga howlgalaan SSC-Khaatumo si la mid ah sida ay degaannada kale ee Soomaaliya uga howlgalaan.

Sidoo kale, Shirkii Golaha Wadatashiga Qaran ee 6-7dii May 2025 waxa uu Goluhu isla aqoonsaday in SSC-Khaatumo ay tahay xubin ka mid ah dowladaha xubinta ka ah DFS, laguna soo dhammaystiro shirweynaha loo ballansan yahay iyada oo la raacayo dastuurka dalka.

Golaha Wadatashiga Qaran waxaa uu Dowladda Federaalka u soo jeediyay in Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka ivo Dib-u-heshiisiinta iyo SSC-Khaatumo iska kaashadaan qabashada shirwaynaha iyo Dhammaystirka Dowlad-dhiska SSC-Khaatumo.

Intaas ka dib, Ra'iisul Wasaare Xamsa Cabdi Barre waxa uu faray Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guddaha, Federaalka, iyo Dib-u-hishiisiinta in la dhammaystiro Maamulka SSC- Khaatumo. 5/7/2025, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guddaha, Federaalka, iyo Dib-u-hishhisinta, Xildhibaan Cali Yuusuf Cali Xoosh waxa uu magacaabay Guddiga Farsamo ee Dhammaystirka Maamul-Dhiska SSC- Khaatumo.

## 1.4 Magacaabista Guddiga Farsamada ee Dhammaystirka Maamul-dhiska SSC-Khaatumo

Guddiga Farsamada ee Dhammaystirka Maamul-dhiska SSC-Khaatumo waxa uu ka boobanaa:

1. **Dr Ahmed-nuur Maxamed Cabdi** Guddoomiye
2. **C/Naasir Xaaji Maxamed** Guddoomiye Ku-xieen
3. **Axmed Shire Axmed (Garoon) -** Xubin
4. **Carafaat Cali Maxamed** Xubin
5. **Axmed Yuusuf Maxamuud** Xubin
6. **Rufaaci Maxamed Salaad** Xubin
7. **Maxamuud Saciid Nuur** Xubin
8. **Faadumo Cabdi Cali** Xubin.



Guddigu waxa uu u dhoofay Laascaanood 6/7/2025 si loo dardageliyo dhammaystirka Maamul goboleedka oo qayb ka ah geeddi-socodka federaalaynta dalka iyo xoojinta maamul daadajinta dalka.

Guddigu waxa uu ugu horaynba salaan iyo kala warqaadasho ugu tagay Hoggaamiyaha SSC Katumo Cabdiqadir Ahmed Cali. Ka dib guddigu waxa uu samaystay qorshe hawleed uu ku hawlgalayo, waxa uuna la wadaagay Hoggaamiyaha SSC-Kaatumo Cabdiqadir Ahmed Aw-Cali.

Guddigu waxa uu qiimayn kooban ku sameeyay xaaladda siyaasadeed ee gobollada lagu midaynayo SSC. Waxaana u soo baxday in ay lama huraan tahay in lala kulmo qaybaha kala duwan ee bulshada oo ay ku jiraan siyaasiyiinta muxaafidka iyo kuwa mucaaradka.

# CUTUBKA 2aad: WAJIGA 1aad EE LA TASHIYADA IYO ISU SOO DHAWEYNTA DANEEYEYAASHA

## 2.1 Hordhac

Meertadan waxay bidhaaminaysaa diyaargarowga daneeyayaasha shirwaynaha oo aan looga maarmin qabashada shirwaynaha Dhammaystirka Dowlad-dhiska SSC-Khaatumo. Daneeyayaasha muhiimka ah oo ay ka mid yihiin odayaasha dhaqanka, siyaasiyiinta, murashixiinta, culumada, ciidanka amniga, dumarka iyo dhalinyarada, iyo guddiyada kala duwan, isfahamkoodu waxa uu keeni karaa in qorshaha Hirgelinta Dhammaystirka SSC-Kaatumo ku qabsoomo si hufan oo waxtar leh.

**URUURINTA XOGTA IYO QIIMAYNTA DANEEYEYAASHA**




Sool, Sanaag, Iyo Buuhoodle waxa ay leeyihiin daneeyayaal muhiim ah oo lafdhabar u noqon kara dhammaystirka Dowlad-dhiska SSC- Khaatumo. Xukuumadda Ku-meel-gaarka ee Maamulka SSC-Khaatumo waa maamul jira labo sano oo sii diyaariyay qaybo badan oo kaabaya dhammaystirka Dowlad xubin ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya. Arrimaha ay Xukuumadda KMG sii qabtay waxaa ka mid ah diyaarinta qabyo-qoraalka dastuurka KMG ee ay yeelanayso Dowladda cusub. Sidoo kale, siyaasiyiinta rajada ka leh hay'adaha la isku doorto sida Madaxwaynaha iyo Madaxwayne

Ku-xigeenka ayaa noqonaya daneeyaasha labaad ee la'aantood aan la dhisi karin Dowlad haysata oggolaansho siyaasadeed.

Culumada, isimada dhaqanka ee Sool, Sanaag, iyo Buuhoodle, dumarka iyo dhalinyarada waa daneeyeyaasha ugu waawayn ee bulshada qaybaheeda kala duwan oo hagaya himilada iyo hiigsiga bulshada degaanka. La kulanka qaybaha bulshada oo kala duwan waxa ay iibinaysaa in hannaanka dhammaystirka Dowlad-dhiska ku dhammaado sidii loo qorsheeyay. Xildhibaannada iyo Wasiirrada Federaalku waxa ay qayb ka yihiin fududaynta siyaasadda iyo isafgaradka beelaha wada dhisanaya maamulka Sool, Sanaag iyo Buuhoodle. Ugu dambayn, Guddiga farsamo waxa uu bilaabay inuu la kulmo dhammaan daneeyaasha kor ku xusan.

## 2.2 Kulamada Daneeyeyaasha Dhammaystirka Maamulka SSC-Khaatumo

### *B) La kulanka Hoggaamiyaha SSC-Khaatumo*

7/7/2025 iyo 8/7/2025, Guddigu waxa uu warbixin iyo xogwaraysi ugu tagay Hoggaamiyaha SSC-Khaatumo Cabdiqadir Ahmed Aw-Cali. Guddigu waxa uu u bandhigay Hoggaamiyaha SSC-Khaatumo qorshe-hawleedka dowlad-dhiska iyo sida ugu dhakhsiyaha badan ee ay ku dedejin karaan hirgelinta qorshaha dhammaystirka. Waxaa la isku af gartay inaan qorshushu dhaafin muddo xileedka Xukuumadda iyo baarlamaanka. Jadwalka ayaa lagu jaangooyay waqti xiliyeedka maamulka iyo Baarlamaanka SSC- Khaatumo.



*Xubnaha Guddiga Farsamo iyo Hoggaamiye Cabdulqaadir*

### T) La kulanka Ciidamada Amniga ee magaalada Laascaanood

9/7/2025, Guddigu waxa uu shirka amniga iyo hawlgelinta qorshaha dhammaystirka maamul-dhiska la yeeshay ciidamada amniga ee magaalada Laascaanood. Guddigu waxa uu ka dhagaystay Wasiirka Amniga iyo Ciidanka Amniga iyo Xasilinta sida ay diyaarka ugu yihiin in si dhaw ay kala shaqeeyaan Guddiga Hirgelinta hawlaha dhammaystirka maamulka SSC. Ugu dambayn, xubin ka mid ah Guddiga ayaa si gooni ah loogu asteeyay inuu la shaqeeyo ciidanka amniga si qorshahu ugu hirgalo si ammaan ah oo aan dhibaato keenin. Isku xirnaantaasi waxay sababtay in ilaa iyo dhammaadka dowlad-dhiska oo aysan dhicin amni darro iyo qulqulatooyin dagaal oo sababay inuu hakad galo geeddi-socodka dhammaystirka maamulka.





Ciidamada amniga ee magaalada Laascaanood

### J) La kulanka Musharrixiinta Xilka Madaxweyne u tartamayso iyo Siyaasiyiinta Degaanka



9/7/2025, Guddigu waxa uu shir wadatashi la yeeshay Murashixiinta u tartamaya xilka Madaxtooyada maamulka cusub. Murashixiintaas iyo siyaasiyiintaas waxaa ka mid ahaa Abdirizak Khalif, Abdirizak Ataash, Bashir Xaaji Cali "Jamaal", iyo Ahmed Karaash. Siyaasintaas oo aan u aragnay inay yihiin geed-fadhiga siyaasadda SSC, waxa ay noo sheegeen inaysan oggolaanayn in xildhibaanno si gooni ah hal murashax uu u qorto. Guddigu waxa uu si cad ugu sheegay in marka hore laga wada shaqeeyo furitaanka shirka, diiwaangalinta ergada, iyo ansixinta Dastuurka. Intaas ka dib, ay mudan yihiin in la isla meeldhigo nooca doorashada iyo hannaanka

xulista xildhibaannada, Intaas waxaa dheer, Guddigu waxa uu ku booriyay siyaasiyiinta in ay hawlgalka wareegga dhammaystirka maamulka qayb ka noqdaan oo aysan marti ka noqon si ay noogu dhacdo maamul dhammaystiran iyo doorasho nabdoon.

Si taas la mid ah 9/7/2025, Waxa uu Guddigu kulan wadatashi la yeeshay Wasiirka Ganacsiga ee Dowladda Federaalka Xildhibaan Maxamuud Axmed - Geesood iyo Senotor Saynab Ismaaciil Maxamed oo degaan doorashadoodu tahay gobolka Sanaag. Kulankani waxa uu ahaa kulankii ugu horeeyay ee aan la yeelano siyaasiyiin heer federal ah oo ka soo jeeda Sanaag. Waxa ay siyaasiniitaasi noo soo jeediyeen hannaanka ay doonayaan inay ula midoobaan Sool iyo Cayn. Waxaan u bandhignay qorshaha hawlgalka waxa ay nagu biiriyeen talooyin wax ku ool ah. Siyaasiontaasi waxay noo yihiin lafdhabarka midaynta labada gobol iyo dhammaystirka maamulka cusub.





Isla maalintaas, waxaan kaloo xafiiskiisa ugu tagnay Hoggaamiye ku-xigeenka SSC, Maxamed Cabdi Ismaaciil. Hoggaamiye Ku-xigeenka waxaan ka dhagaysanay aragtidiisa shirka iyo sababaha uu ku diiddan yahay qabsoomidda shirka. Hoggaamiye Ku-xigeenka waxa uu qabaa in SSC-Khaatumo ay shirkeeda qabsato, is doorato, ka dibna reer Sanaag lala midoobo. Guddigu waxa ay tusaaleeyeen Hoggaamiyaha inay jirto waqti u harsan xukuumadda oo ay hawlahaas ku qaban karto iyo in dhammaystirka maamulka uu muhiimad ugu fadhiyo Soomaaliya oo midnimadeeda sii jirto iyo gobol kale oo aad wax wada dhisataan.




Sidoo kale, Guddigu waxa uu wadatashi iyo isxogwaraysi balaaran la yeeshay 10/7/2025 Golaha Aayo-katashiga SSC- Khaatumo (33da) oo lagu beddelay Baalmaanka SSC ee haddana waqtigoodu dhammaanayo. 33daan xubnood, waxaa la aasaasay waqtigii dagaaladu socdeen, waxayna u hawlgaleyeen golaha fulinta ee SSC-khaatumadii dagaalka ku jirtay halka isimadu ahaayeen siyaasiyiinta leh go'aanka dadka iyo Dowladnimada. Xubnahaas 33da ah waa golaha ugu saamaynta badan marka laga hawgalayo Laascaanood. Falanqayn iyo xog-is-waydaaris badan kadib, waxaan isla qaadanay in shirka la furo oo ay nagu garab istaagaan ujeeddooyinkii aan u nimid Laascaaood.






Kulanka dhacay 11/7/2025, waxa uu guddigu la yeeshay Guddoomiyihii hore ee Baarlamaanka Puntland ahna xildhibaan Golaha Wakiillada Puntland, Mudane, Abdirashiid Yuusuf Jibriil (Abwaanka). Kulankaasi waxa uu guddoomiyuhu ku caddeeyay in ay doonayaan warqad cad in wax lagu billaabo oo aan SSC- Khaatumo waxba lagu dul dhisin. Guddigu waxa uu u xaqiijiay doorka Guddiga Farsamadu inaanu ahanyn inuu jujuubo beel ka mid beelaha wax wada dhisanaya, isla markaana guddigu fududayn farsamo iyo talobixin siinayo beelaha ku midoobaya maamulka cusub.




Kulamada Dhaqanka iyo Siyaasiyiinta Sanaag

11/7/2025, Isimada dhaqanka Sanaag oo uu hoggaaminayo Garaad Faatix iyo guddiga ayaa shir wadatashi ku yeeshay gurriga Garaad Faatix. Odeyaashu dhaqanka waxa ay noo muujiyeen sida ay ugu hammuun qabaan dhismaha Dowlad goboleedka. Waxa ay noo sheegeen in dhulkoodii loo boobay waddamo shisheeye oo ay macdan sharci darro ku guranayaan, waxayna Guddiga u sheegeen in ay doonayaan inay ka mid

noqdaan Dowladda Federtaalka. Waxa ay tilmaameen in muddo soddon iyo shan sano ah ay u dhaxeeyeen dulmi laba geesood ah oo dhulkoodii laga kiraystay burcad macdaneed shishiiye. Waxay Guddiga ka codsadeen in la dedejiyo taabogelinta dhammaystirka Dowlad goboleedka.




Dhaqanka Sanaag oo uu hoggaaminayo Garaad Cabdikariim Cali Garaad iyo Guddiga Farsamo ayaa ku kulmay guriga uu degan yahay Garaadka iyo beesha uu matalo taariikhdu markay ahayd 11/7/2025. Isxogwaraysi iyo fikrad iswaydiin ka dib waxaa lagu heshiiyay in la dhisto Dowlad wadaag ah oo si cadli lagu qaybiyo. "*Cadli darrada ay nagu hayaan Dowlad goboleedyada daafaha naga xiga waxaan ka doorbidaynaa inaan dhisanno Dowlad goboleed ka tirsan Dowladda Federaalka oo ka shaqeeya horumarka dadka iyo dalka. Degaanku iyo dadkuba waxaa horumar ugu dambeeyay Dowladii Kacaanka ee burburtay 1991dii.*" Garaad Cabdikariim. Guddigu waxa uu xaqiijiyay in ay ka go'an tahay hirgelinta dhammaystirka dowladdaan ayna muhiim tahay ina ay iyaguna garab istaagan guddiga.




Guddigu waxa uu shir la yeeshay dhaqanka Axmed Harti iyo Senator Maxamed Cismaan Majiino. Beelaha Axmed Harti oo muhiim u ah dhismaha Dowlad goboleedka SSC. Waxa ay taageereen hannaanka dhammaystirka Dowlad-dhiska SSC. Waxa ay soo jeediyeen in shirka la furo oo lagu xaliyo isdiidda walba shirka dhexdiisa. Beeshu waxa ay codsatay in si mug leh loo siiyo ergo si ka qaybgalkooda iyo metelaaddoodda bulsho ay u muuqato taasoo keeni karta Dowlad loo dhan yahay. Guddigu waxa uu ugu hambeelyay taageerada ay u hayaan shirka furitaankiisa ayagoon wax shardi ku xirin.



Cuqaasha Gobolka Sanaag, gaar ahaan Dubays iyo Bahwadaagtiisa, ayaa Guddiga kula kulmay Hotel Xamdi ee Magaalada Laascaanood. Dood dheer ka dib, Cuqaasha iyo Guddigu waxa ay isla garteen in shirka la furo, caqabadaha soo wajahana si wadajir ah loo xaliyo. Shirkaas waxaa la isla qiray in Maamul Goboleed ay u madax-bannaan yihiin dadka degaanka Sanaag iyo Sool oo ay horseedi doonto Soomaaliya oo dib u midowdo iyo fikradaha gooni-goosadka oo la shiiqiiyo. Cuqaashu waxa ay sheegeen in beelaha iminka sheeganaya go’itaanka ay ku soo biiri doonaan maamulkaan marka uu taabo-galo.

 

Beesha Dubays iyo Bahawadaagtooda

### *X) La kulanka Guddiga ee Dhalintyarada*

Kulanka Dhalinyarada oo dhacay 11/7/2025, ayuu Guddigu la yeeshay dhalinyarada daneenaysa inay ka qayb qaataan dhammaystirka geeddi-socodkan ee ah hannaanka loo marayo maamul-dhiska iyo fursadaha u furan haweenka iyo dhalinyarada ee ka qaybgalka siyaasadda iyo meelaha go'aannadoodda dhaqaale, bulsho, amni, aqoon iyo caafimaad loagu gaaray. Guddigu waxa uu u xaqiijiyay inay ergooyinka u qoondeeyeen xad dhalinyaro ah oo ka mid noqonaya ergooyinka shirka. Ka qaybgalkaasi inuu siin doono inay soo bandhigaan qoondada dhalinyarada ee Golaha Wakiillada iyo Xukuumadda Dowladda cusub.



Sawirka Dhalinyarada SSC

### *Kh) Kulamada Guddiga Iyo Wasaaradaha SSC*

**Guddiga iyo Wasiirka Maaliyadda SSC- Khaatumo**

Guddoomiyaha guddiga iyo xubno ka mid ah guddiga ayaa shir wadatashi kula yeeshay xarunta Xukuumadda Wasiirka Maaliyadda ee SSC- Khaatumo 12/7/2015. Shirkaasi waxaa lagu go'aamiyay in lala kulmo safaarado muhiim u ah maalgelinta geeddi-scodka shirka. Shirka ayaa lagu go'aamiyay in xubno Guddiga Farsamo ka mid ah iyo Wasiirka Maaliyadda ay safar shaqo ku tagaan Mugadishu.

**Guddiga iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha ee SSC**

12/7/2025, Guddigu iyo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo hormuud u ah Guddiga taakulaynta Dhammaystirka Maamul-dhiska SSC waxay isla dejiyeen hannaanka furitaanka shirwaynaha, habmaamuuska, jadwalka iyo amniga furitaanka shirwaynaha. Waxa ay isla dejiyeen sida uu u dhacayo Shirwaynaha Furitaanka.

## 2.3 Saamaynta Wadatashiyada Daneeyeyaasha Uu Ku Yeeshay Furitaanka Shirka

### *B) Moosid cabsi faragalin*

Wadahadallada daneeyeyaasha waxa ay meesha ka saartay tuhun ah in Guddiga Federaalka loo soo dhiibay ajendooyin qarsoon oo ay ku dhisayaan murrashax gaar ah. Dood iyo hago tusaalayn badan ka dib, daneeyayaashu waxaa u caddaatay in Guddigu u yimid talo-bixin, taakulayn, iyo taageerid hannaan walba oo ay dadka gobolollada Sanaag, Sool, iyo Buuuhoodle ku hishiiyaan. Tuhunkaas marka uu Meesha ka baxay waxaa fududaatay in la wadahadlo, la is calool xaarto, shirwaynihiina la furo ayadoo loo wad dhan yahay.

### *T) Lahaanshiyaha geeddi-socodka dhammaystirka Maamulka SSC*

Wadahadallada daneeyeyaashu waxa ay abuurtay in ay dhammaan siyaasiyiinta iyo ergadu qaataan doorka lahaanshiyaha iyo inay dhisanayaan maamul ay ayagu leeyihiin qaab-dhimeedkiisa, awooddiisa metalaadda tirada xubnaha baarlamaanka ay ayagu jaangoynayaan, waqtiga jiritaanka hay'adaha fulinta ay ayagu xaddidayaan. Lahaanshiyaha geeddi-socodku waxa uu keenay in dhammaan bulshadu ay si siman uga dooddayaan qodobada muhiimka ah ee lagu midaynayo labada gobol iyo Buuhoodle. Ka go'aananshaha bulshada iyo siyaasiyiinta iyo wadashaqaynta uu abuuray Guddiga Farsamo waxa ay dhalisay in ergada yimaadaan furitaanka shirwaynaha isla markaana la diiwaangeliyo ergada.

### *J) Wadahadallada oo furmay*

Wahadalladii ay fureen Guddiga Farsamo waxa ay fududaysay in Xukuumadda iyo siyaasiyiinta mucaaradku ka wada hadlaan hannaanka Dhammaystirka Maamul-dhiska SSC, Amniga, iyo in laga wada shaqeeyo hamiga iyo hiigisigii bulshawaynta degaannnadan. Saamaynta ugu wayn ee uu keenay wadahadalku waa in si nabadgelyo ah shirku u socdo, si ilbaxnimo ahna la isku qancinayo, taasoo keeni karta inuu shirku u miro dhalo si waxtar leh. Dhinaca bulshada, qaybaha kala duwan sida aqoonyahannada, culumada, dhalinyarada iyo dumarka ayaa wada doodo cilmiyaysan oo ay ku toosinayaan shirka kuna saxayaan qodobada la isku maandhaafsan yahay.

### *X) Rabitaanka bulshada oo kordhay*

In kastoo uu markii horeba sareeyay ka go'naanshaha bulshada iyo Xukuumadda dhammaystirka maamul-dhiska SSC, haddana Guddiga Farsamo waxa uu kor u qaaday hamiga iyo rabitaankii siyaasiyiinta iyo bulshada. Guddigu waxa uu ku guulaystay inuu jadwaleeyo hawlaha muhiimka ah lana wadaago daneeyeyaasha muhiimka ah si geeddi-socodka loogu dhammeeyo muddo aan ka badnayn soddon (30) maalmood. Waqtigaas kooban waxa uu abuuray in bulshada qaybaheeda kala duwan ay guddiga kala shaqeeyaan sidii loo hirgelin lahaa hawlaha qorshaysan inay ku qabsoomaan waqtigii loo qoondeeyay.

# CUTUBKA 3aad: WAJIGA 2aad EE SHIRWEYNAHA QARAN IYO SAMEYNTA & ANSIXINTA DASTUURKA

## 3.1 Hordhac

Kani waa cutubka udub-dhexaadka u ah buugga, maadaama uu si qoto dheer uga hadlayo Shirweynihii Dhammaystirka Dowlad Goboleedka SSC-Khaatumo, oo si rasmi ah u furmay 13-kii Luulyo 2025. Waxaa lagu sharraxayaa sida ergo ka badan 600 oo qof ay uga doodeen qabyo-qoraalka Dastuurka. Ergada waxaa loo qaybiyay kooxo si ay u lafa-guraan qodobada xasaasiga ah sida magaca dowlad-goboleedka, calanka, caasimadda, iyo qaab-dhismeedka dowladda. Geeddi-socodku wuxuu gaaray heerkii ugu sarreeyay 30-kii Luulyo 2025, markaas oo 417 ergo oo goobjoog ahayd ay si aqlabiyad ah ku ansixiyeen Dastuurka, iyagoo u codeeyay magaca "Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya."

## 3.2 Shirwaynaha Dhammaystirka Dhisidda Dowlad Goboleedka SSC-Khaatumo

Laascaanod, 13ka Luulyo 2025 – Waxaa si rasmi ah loo daahfuray Shirwaynaha Ergada ee Dhammaystirka Maamul dhiska Dowlad Goboleedka SSC-Khaatumo, kaas oo lagu qabtay magaalada Laascaanood. Shirwaynahan muhiimka ah oo ah mid taariikhi ayaa la filayaa inuu noqdo dhabbaha loo maro dhismaha Dowlad-goboleed rasmi ah oo matasha shacabka deggan gobolladan muhiimka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Furitaanka shirka waxaa Quraan iyo wacdi ku furay Sheekh Adam Cabdi Xuseen (Adamwali) oo ku waaniyay ka qaybgalaaysha shirka in ay adkeeyaan wadajirka ummadda iyo in la yareeyo khilaafka bulshada.

Shirka waxaa kasoo qeyb galay in ka badan 600 oo qof oo si cilmiyeysan loo soo xulay, kuwaas oo ka kala yimid dhammaan saddexda gobol ee Sool, Sanaag iyo Cayn. Ka soo qayb-galayaashu waxay matalayeen dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada, oo ay ka mid yihiin: Dhalinyarada, Siyaasiyiinta, Waxgaradka dhaqanka, Haweenka, iyo Qurbojoogta degaannadan.

Sidoo kale, waxaa shirka ka soo qaybgalay marti sharaf heer qaran ah oo ay ka mid yihiin: Xildhibaanno ka tirsan Labada Gole ee Dowladda Federaalka, Wasiirro heer

Federaal iyo kuwa Maamulka SSC-Khaatumo, Isimada dhaqanka, Aqoonyahanno iyo Wakiillo ka socda Jaaliyadaha Dibedda

Wasiirka Arrimaha Gudaha SSC-Khatumo Mudane Cabdisahal Jaamac Maxamed Ismaaciil ayaa asaga oo ku hadlaya magaca Guddiga Qabanqaabada Shirka iyo Soo Dhawaynta Ergooyinka ku soo dhaweeyay ka qaybgalayaasha shirka, martida, xubnaha Guddiyada kala duwan, iyo xildhibaannada iyo wasiirrada heer federal in ay Sharaf u tahay inay ku soo dhawaadaan shirka. Waxa uu u rajeeyay Wasiirku ka qaybgalayaasha shirka inay iska xil saaraan in dhammaystirka Dowlad-dhiska SSC- Khaatumo ku dhammaato si hufan, loo wada dhan yahay, isla markaana la isku dulqaato.








Guddoomiyaha Guddiga Farsamo ee Dhammaystirka Dowlad-dhiska SSC-Khaatumo ayaa soo bandhigay qorshaha lagu dhammaystirayo midowga gobaladaan. Qorshaha ayaa ku bilaabanaya in ergooyinku yimaadeen magaalada Laascaanood, shirkuna




furmo. Ka dib, waxaa la guda gali doonaa in la qaybsado ergada shirka oo laga doodo qoabyo-qoraalka dastuurka oo uu Guddiga Diyaarinta Dastuurku diyaariyay. Qabyo-qoraalka ayaa la galin doonaa codka ergada si loo ansisixyo.

Guddoomiyaha Guddiga Farsamo ayaa sheegay in marka la ansixiyo Dastuurka Dowlad Goboleedka cusub la xuli doono xubnaha Golaha Wakiillada si ay u doortaan Guddoonkooda, madaxwaynaha iyo ku-xigeenkiisa.

**Daahfurka Shirweynaha**

Shirka waxaa si rasmi ah u furay Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, Mudane Cali Yuusuf Cali (Cali Xoosh), isaga oo khudbad dhiirrigelin leh ka jeediyey madasha. Wasiirku wuxuu shirka ku tilmaamay "mid taariikhi ah oo dhidibada u taagaya mustaqbalka nabadeed iyo horumarka siyaasadeed ee gobollada Sool, Sanaag iyo Cayn."

Isagoo ka hadlayey muhiimadda dhismaha maamul-goboleed rasmi ah, wuxuu yiri: "Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay aaminsan tahay in xalka kaliya ee nabad iyo horumar lagu gaadhi karo uu yahay in Goboladda Sool, Sanaag, iyo Cayn ay helaan Maamul Goboleed dhammaystiran oo si rasmi ah uga mid noqda nidaamka Federaalka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya."

Wasiirku waxaa kale oo uu u sheegay ka qaybgalayaasha shirka inay maanta bulshada gobollada Sanaag, Sool, iyo Ceyn ay haystaan fursad wayn oo ay maanta ku samaysan karaan Dowlad dhammaystiran oo xubin ka noqota Dowladdaha hoos taga Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Hadaljeedintii Hoggaamiyaha SSC-Khaatumo**

Hoggaamiyaha Maamulka Ku-meel Gaarka ah ee SSC-Khaatumo, Mudane Cabdulaqaadir Axmed Aw-Cali, ayaa isaguna khudbad qiimo badan ka jeediyay madasha. Wuxuu xusay in:

"Dhismaha Dowlad-Goboleedkan uu yahay fursad dahabi ah oo shacabka degaanka u oggolaanaysa inay yeeshaan maamul ay iyagu iska leeyihiin, kuna saleysan wada-tashi, midnimo iyo dan-wadaag. Waa waajib qaran in la xaqiijiyo in Khaatumo iyo Maakhir ay si buuxda u midoobaan."




Waxaa kaloo shirka ka hadlay odayaasha dhaqanka ee Sool, Sanaag, iyo Ceyn, xildhibaannada heer federal, Wasiirrada heer federaal, culumada, qurbajoogta, dumarka iyo dhaliyarada oo dhammaantood tilmaamay muhiimadda shirka iyo midaynta gobollada Sool, Sanaag, iyo Buuhoodle.

**Muuqaal Taabanaya Xusuusta Taariikhda**

Intii uu socday daahfurka shirwaynuhu, waxaa la daawaday muuqaal si qiiro leh uga sheekeynaya marxaladihii kala duwanaa ee ay soo mareen gobollada Sool, Sanaag iyo Cayn. Muuqaalkan ayaa iftiimiyay muhiimadda ay leedahay in la dhiso Maamul Goboleed mideeya shacabka degaanka, una horseeda horumar, nabad iyo midnimo qaran.

**Soo xidhista Wejiga Koowaad ee Shirka**

Soo gabagabeynta wejiga koowaad ee shirweynaha waxaa si rasmi ah u soo xiray Guddoomiye ku-xigeenka Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Cali Xirsi (Timacadde). Wuxuu carrabka ku adkeeyay in:

"Xilligan la joogo ay lama huraan tahay in la mideeyo maamulka Khaatumo iyo Maakhir si loo helo Maamul Goboleed awood leh, oo matala shacabka gobolladan una adeega danta guud ee qaranka Soomaaliyeed."

Shirweynahan Dhammaystirka maamulka gobollada Sool, Sanaag iyo Cayn wuxuu calaamad u yahay guul weyn oo loo marayo geeddi-socod siyaasadeed oo furan, nabad ah, loona dhan yahay. Waxaa la filayaa in maalmaha soo socda ay ergooyinku furaan dood furan oo ku saleysan wada-tashi iyo is-qancin, si loo dhiso maamul si buuxda u matala shacabka degaanka, ugana mid noqda nidaamka Federaalka Soomaaliya.

Shacabku waxay rajo weyn ka qabaan in shirkan uu noqdo mid horseeda isbeddel dhab ah, oo xoojiya midnimada qaran, kana fogaada kala-qaybsanaanta iyo colaadda.

## 3.3 Kulamada Guddiga ee Daneeyeyaasha Ergada Shirka

Guddiga Farsamo ayaa la kulmay Murrashax Jamaal Maxamed Xasan 19/7/2025 si loo fududeeyo diiwangelinta ergada. Guddiga ayaa u sheegay Mudane Jamaal in ay muhiim tahay inuu soo fududeeyo ergada Sanaag si loo furo shirka ergada. Murrashax Jamaal Maxamed Xasan ayaa soo jeediyay in Guddigu uusan ku ekaan heer farsamo ee ay dhexgalaan awood qaybsiga beelaha, xulista ergada, xulista xildhibaannada Golaha Wakiillada ee Dowladda cusub. Sidoo kale, Guddigu waxa uu ka codsaday Murrashax Jamaal inuu ka hawlgalo sidii uu ergada Sanaag u keeni lahaa shirka si loo diiwaangeliyo uguna qayb qaataan doodda ergada.

**La kulanka Siyaasiyiinta**




Guddiga Farsamo ayaa la kulmay xubno ka socday Xildhibaannada Golaha Baarlamaanka ee heer Federaal iyo Wasiirrada heer Federaal taariikhdu markay ahayd 25/7/2025. Guddigu waxa uu warbixin dheer siiyay xildhibaannada iyo Wasiirrada Federaalka taasoo iftiimisay tirada ergada ee shirka ku jira, doodda ergada, qodobada laga doodayo, iyo watiga u astaysan in qaybo-qoraalka dastuurka lagu ansixinayo. Xildhibaannadu waxa ay amaaneen shaqada Guddiga Farsamo iyo hawlaha u qabsoomay. Wasiirka iyo xildhibaannada ayaa sheegay in ay Laascaanood u yimaadeen in ay xalliyaan cabasho beel gooni ah oo ka cabanaysa tirada ergada iyo inay taageeraan Dhammaystirka Maamul-dhiska SSC. Xildhibaannada iyo Guddigu waxa ay isla qaateen in ay sii joogaan magaalada si ay ula xalliyaan caqabadaha imaanaya ee u baahan fududaynta degdega ah.




**La kulanka dhaqanka iyo beelaha degaanka**

Guddiga Farsamo ee Dhammaystirka Maamul-dhiska SSC- Kaatumo ayaa la kulmay beesha Fiqishini 14/7/2025. Beesha ayaa soo bandhigtay cabasho ay ka qabaan sida loo qaybiyay ergada shirka. Guddiga ayaa u xaqiijiyay in cabashada beesha ay qaateen oo ay doonayaan inay xalliyaan sida ugu dhakhsiyaha badan. Kulanka ayaa ku soo dhammaaday is-af-garad iyo in ergada ay yimaadaan shirka isla markaana la xaliyo arrimaha ay cabashada ka keeneen.






Beesha Ogaadeen/Jibraahiil ayaa la kulmay Guddiga Farsamo 16/7/2025 ayaga oo u gudbiyay cabasho ay ka qabaan qoondada laga siiyay ergada shirka. Guddigu, marka uu dhagaystay cabashada, waxa uu u sharraxay sida loo qaybsanayo in ay tahay in ay beeluhu ayaga ku hishiiyaan isla markaana ay Guddiga u soo bandhigaan. Haddiise ay dacwo ka timaaddo ergada ay ku celinayaan beelaha wax wada dhisanaya, Xukuumadda SSC- Khaatumo, iyo Madaxda Heer Federaal. Cabashooyinkaas waxaa lagu hagaajiyay hay'adaha ay khusayso.

## La kulanka dhalinyarada

Guddigu waxa uu la kulmay dhalinyarada Sool, Sanaag, iyo Buuhoodle taariikhdu markay ahayd 14/7/2025. Dhalinyarada ayaa waydiisay Guddoomiyaha Guddiga Farsamo, Dr Ahmed-nuur Maxamed Cabdi, su'aalo ku aaddan ka qaybgalka Dowlad-dhiska SSC iyo sida ay siyaasadda SSC uga qayb qaadan karaan. Guddoomiyuhu waxa uu ku booriyay dhalinyarada in ay fududahay in ay la jaanqaadaan maamulka cusub maadaama loo baahan yahay aqoonta iyo khibradda dhialinyarada. Dhalinyaradu waxa ay codsadeen in qoondada dhalinyarada ee baarlamaanka SSC la qoonddeyo si ay dhalinyaradu u hesho fursado ay kor ugu qaadi karaan inay horumaiyaan siyaasadaha kor u qaadaya dhaqaalaha dhalinyarada, shaqo-abuurka dhalinyarada si ay u joogsato tahriibka dhalinyarada iyo khataraha ay wajahayaan.



**La kullanka Haweenka SSC**

26/7/2025, Guddiga Farsamo ayaa la kulmay dumarka SSC ee u qareema kor u qaadidda qoondada haweenka ee goleyaasha la isku doorto iyo mas'uuliyadda la isku magacaabo oo ay ku jiraan hay'adaha fulinta. Ujeeddada haweenka ayaa ahayd inay go'aannada taabanaya haweenka iyo qoyska aysan la gooni noqon raggu. Dumarka ayaa Guddiga Farsamo u sharraxay saamaynta togan ee ay yeelan karto go'aannada ku kooban ragga oo kaliya. Guddoomiyaha Guddiga Farsamo ayaa u ballan qaaday inay horay uga shaqeeyeen inay diidaan aqbalidda ergo aysan ku jirin haween, ayna iminka ka shaqaynayaan Habraaca Xulista Xildhibaannada. Golaha Wakiillada SSC oo shardinaya in ugu yaraan boqobkiiba sodon (30%) ay xildhibaannadu noqdaan dumar.







**Kulanka Guddoomiyaha Baarlamaanka**

Guddiga Farsamo ayaa 19kii Luulyo 2025 kulan banbax ah kula yeeshay Guddoomiyaha Baarlamaanka SSC-Khaatumo mudane Jaamac Yaasiin Warsame si loo dardargaliyo shirwaynaha ergada. Guddoomiyaha ayaa ku dhiirgaliyay Guddiga Farsamo inay dadajiyaan Dhammaystirka Dowlad-dhiska SSC-Khaatumo si uusan u dhicin firaaq waqti maadaama uu dhacayo waqtiga Golaha wakiillada ee Dowlad Goboleedka SSC- Khaatumo.

## 3.4 Saamaynta Wadatashiyada Daneeyeyaasha uu Ku Yeeshay Shirka Ergada

### *B) Fududaynta Awood Qaybsiga Ergada ee Beelaha*

Kulamadii waxa ay keeneen in beelaha iyo siyaasiyiinta qaybahooda kala duwan ay ku hishiiyaan qodobada dastuurka gundhigga u ah. Qodobadaas waxaa ka mid ah magaca dowlad-goboleedka, calanka dowlad-goboleedka, caasimadda dowlad-

goboleedka, caasimadda labaad oo ah magaalada ganacsiga dowlad-goboleedka, tirada xubnaha Golaha Wakiillada, qaab dhismeedka Maamulka Dowlad-goboleedka, iyo nooca hay'adaha garsoorka iyo wadashaqaynta amniga ee Federaalka iyo maamulka cusub.

### *T) Ansixinta Dastuurka Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya*

Dastuurka waxa uu u baahnaa in siyaasiyiinta, odeyaasha dhaqanka, egrada, iyo Xukuumadda KMG ee SSC-Khaatumo ay isla aqbalaan qodobada muhiimka ah si loo ansixiyo. Ma fududayn in muddo kooban lagu qanciyo in dhammaan daneeyayaashu ay isla qaataan ansixinta dastuurka.

## 3.5 Waajibaadka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka & Guddiga Farsamo

Wasaaradda Arrimaha Guddaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda dastuuriga ah, waxay ku hawlan tahay geeddi socodka federaalaynta dalka iyo isku xirka, xoojinta xiriirka iskaashiga heerarka Dowladda, xaqiijinta iyo hirgelinta Dowlad wanaagga.

Sidoo kale, Wasaaradda waajibaadkeeda waxaa ka mid ah in ay gacan ku siiso Dowlad Goboleedyada qabyada ah sidii loo dhammaystiri lahaa loona gaarsiin lahaa sidii ay u qaban lahaayeen doorashooyin daah-furan oo xor iyo xalaal ah, waafaqsanna dastuurka ku meel gaarka ah ee dalka, Qodobka 46aad ee Mabaadii'da Guud ee Matalaadda Shacabka, gaar ahaan faqradahan hoos ku qoran:

(2) Nidaamka matalaadda shacabku waa in uu ahaado mid furan oo qof kasta fursad u siinaya in uu ka qeyb qaato habraacyadiisa iyo xeerarkiisa si fududna loo fahmi karo;
(3) Nidaamka matalaaddu waa in uu ahaadaa mid si ku filan oo macquul ah uga hortegi kara qalalaase ka dhasha tartanka siyaasadda.

Iyada oo la raacayo Dastuurka Ku-Meel Gaarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo halbeegyada geeddi-socodka maamul dhiska SSC-khaatumo, waxaa waajibaadka ugu weyn ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ka mid ah dhisidda maamul goboleedyada si ay uga mid noqdaan hannaanka Federaalka ee JFS ay qaadatay iyo daadejinta awoodaha iyo adeegayada dowladda. Ka dib safarkii nabadda ee taariikhiga ahaa ee uu Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku soo maray degaannada SSC-Khaatumo oo ku aaddanaa 14kii Abriil,

2025 iyo qabashadii kulamo ku saabsan dhammaystirka Dowlad goboleedka SSC-khaatumo, ayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxay magacowday 5tii Luulyo 2025 Guddiga Farsamo ee Dhammaystirka Maamul Dhiska SSC-Khaatumo, si loo bilaabo dib u dhiska iyo dhammaystirka hay'adaha Dowlad Goboleedka SSC-Khaatumo. Haddaba, si loo suurtageliyo geeddi-soodka dhammaystirka maamul dhiska SSC-khaatumo waxaa la dejiyay qorshe hawleed waqtiyaysan:

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib-u-Heshisiinta ayaa dejisay Waajibaadka Shaqo (ToR) Guddiga Farsamo ee Dhammaystirka Maamul dhiska Dowlad Goboleedka Sool, Sanaag iyo Cayn. Xubnaha Guddiga Farsamo ee Dhammaystirka Maamul dhiska Dowlad goboleedka Sool Sanaag iyo Cayn wuxuu ka kooban yahay 8 xubnood oo ka kale imaanaya Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta iyo Khubaro kale.

Hawlaha iyo waajibaadka xubnaha Guddiga Farsamo ee Dhammaystirka Maamulka Dowlad Goboleedka Sool Sanaag iyo Cayn waxaa ka mid ah:

1. Fulinta geeddi-socodka dhammaystirka dhismaha Maamulka Dowlad Goboleedka Sool, Sanaag iyo Cayn:
    - Diyaarinta qorshe-hawleedka hirgelinta geeddi-socodka Dhammaystirka dhismaha Maamulka Dowlad Goboleedka Sool, Sanaag iyo Cayn.
    - Diyaarinta shuruudaha xulista oday-dhaqameedyada rasmiga ah iyo waajibaadkooda.
    - Dejinta habraaca xulista ergada iyo waajibaadkooda.
    - Qabanqaabinta iyo maamulidda barnaamijyada shir-weynaha Maamul-dhiska.
    - Ku tababaridda oday-dhaqameedyada waajibaadkooda iyo hannaanka xulista ergada.
    - Qabashada liiska ergada iyo xaqiijinta waafaqsanaanta habraaca xulista ergada.
    - Ku tababaridda iyo wacyigelinta ergada waajibaadkooda shaqo.
    - Isku duwidda xiriirka wadashaqeynta dhammaan daneeyeyaasha maamul dhiska Dowlad Goboleedka Sool, Sanaag iyo Cayn.
2. Kaalmaynta guddiga maxalliga ah ee dhanka Sugidda amniga goobaha shirwaynaha:
    - Isku xirka hay'adaha amniga ee heer Federaal iyo heer Gobol.
    - Xaqiijinta sugnaanta amni ee goobaha lagu qabanaayo barnaamijyada Maamul dhiska.

- Xaqiijinta sugnaanta amni ee oday dhaqameedyada, ergada iyo degaannadoodda muddada uu shirka socdo.
- Xaqiijinta sugnaanta amni ee xarumaha, agabka iyo hawlwadeennada Maamul dhiska.

3. Hirgelinta habsami u socodka shirweynaha:
   - Diyaarinta goobta shirka
   - Diyaarinta liiska iyo kaararka ka soo qeybgaleyaasha
   - Dejinta iyo dhaqangelinta hab-maamuuska shirweynaha
   - Daadihinta iyo ilaalinta habsami u socodka shirweynaha.
4. Xaqiijinta helitaanka tasihiilaadka (logistics) iyo agabyada lagama maarmaanka u ah fulinta geeddi socodka Shirwaynaha iyo maamul dhiska.
5. Isku duwidda xiriirka warbaahinta
6. Diyaarinta warbixinnada:
   - Ilaalinta xogaha xasaasiga ah
   - Barnaamijyada geeddi-socodka maamul-dhiska
   - Shirarka geeddi-socodka maamul-dhiska
   - Daabacaadda habraacyada iyo waajibaadyada shaqo
   - Daabacaadda iyo baahinta qoraallada wacyigelinta
   - Warbixinta guud ee Dhisidda Maamulka Dowlad Goboleedka Sool, Sanaag iyo Cayn
7. Sugidda iyo ilaalinta habsami u socodka shirwaynaha, Xubnaha Guddiga Waxaa ku waajib ah:
   - Dhowrista xogaha sirta xasaasiga ah.
   - Wada shaqeyn ku dhisan xushmad, ixtiraam, is maqal iyo kala dambeyn.
   - Ka fogaanshaha af lagaaddo iyo isku gacan-qaad.
   - Ku gudashada hawlaha loo idmaday daacadnimo iyo eexasho la'aan.
   - Ku fulinta ballamaha iyo hawlaha u yaalla waqtigii loo asteeyay
   - U gudashada waajibaadka si dhexdhexaad ah iyo ka fogaanshaha danaha gaarka ah
8. Xulidda Ergooyinka; Cuqaasha beelaha ayaa soo xulay xubnaha ergooyinka ka dib waxaa la bilaaabay soo xulay ergooyinka diiwaan gelinta Ergada ee ka kala socday Sool, Samaag iyo Togdheer oo ka kooban Odayaasha Dhaqanka, Cuqaasha, Haweenka, Dhalinyaradda, Aqoon-yahanka, Ganacsatada iyo Qurbe-joogta.
9. Diiwaan gelinta; Xulitaanka ergada ka dib waxaa la bilaabay diiwaan-gelinta xubnaha ergooyinka oo aan kor ku soo xusnay oo gaarayey 376 xubnood, Qubajoog ay tiradoodu tahay 56 xubnood iyo Martisharaf. Marti -Sharafta waxaa ka mid ah Wasiiro iyo Xildhibaanno Heer Federaal ka socda, Ururada Bulshada Rayidka, Jaamacadaha iyo Aqoonyahanka.






**b. Habka Xulista:** Ergooyinka waxaa lagu xulay latashi beelaha iyo mid degaan, sidoo kale waxaa hubinayay oo xaqiijiyay guddiga Xulista Ergada, si eysan u imaanin beel ama degaan aan la matalin.

**t. Habka Diiwaan Gelinta**: waxaa uu ahaa; in uu heysto magaca, degaanka uu matalo, iyo warqad aqoonsi ah.

**j. Xaqiijinta Sinnaanta**: In ay haweenku helaan qoondo gaareysa 30% ama wax u dhow, In ay dhalinyarada iyo dadka qaba baahiyaha gaarka qaba ay muuqato matalaaddooda iyo in beel kastaa laga helo hal aqoon yahan iyo hal Oday dhaqameed.



Guddiga Farsamada Maamul Dhisidda iyo dhammaystirka Dowlad Goboleedka waxa uu u xil saaran yahay fulinta habraacyada iyo shuruudaha loo dejiyey hubinta hoggaamiye dhaqameedyada rasmiga ah. Kaa oo lagu saleynayo Shuruudaha Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalku ku aqoonsato odayaasha dhaqanka rasmiga ah; Odayaasha dhaqanka ee Wasaaradda Arrimaha gudaha Federaalka iyo Dib u heshiinta ka diiwaan gashan, Odayaasha dhaqanka ee ka diiwaan gashan Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee heer Dowlad Goboleed kuwaa oo ay u aqoonsato inay ka mid yihiin saxiixayaasha rasmiga ah ee soo xulaya ergooyinka ka imanaya Dowlad goboleedka Waqooyi Bari ee Soomaaliya kuwaa oo soo buuxiya Dhammaan shuruudaha soo socda:

1. In uu ku jiro diiwaanka dhaqanka ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka ugu yaraan lix bilood ka hor taariikhda daah-furka hannaanka xulidda xildhibaannada Golaha Wakiillada DG-ka.

2. In uu yahay madax dhaqameed aqoonsi iyo kalsooni ka haysta madax dhaqameedyada beeshiisa laguna yaqaan in uu ka shaqeeyo xallinta khilaafaadka iyo dib u heshiisiintsa beelaha;
3. In uu deggan yahay lagana yaqaanno degaanka Dowlad Goboleedka uu matalayo;
4. In uu yahay shakhsi lagu yaqaan ammaano, caddaalad, dhowrsanaan iyo hufnaan;
5. In caafimaadkiisa maskaxeed wanaagsan yahay, uuna xilka loo igmaday si buuxda u gudan karo.
6. Oday dhaqameedki samaystay/samaysanaya wakiil, waa in uu wakaaladdiisa soo marsiiyaa Wasaaradda Arrimaha Gudaa;
7. Haddii madax dhaqameed xilka uu banneeyo, ka geeriyoodo ama la waayo waxaa xubintaas soo buuxsanaya beeshiisa;
8. Waxaa dhaqanka Soomaaliyeed looga digayaa in hoggaanka
9. Dhaqanka beelaha ee soo jireenka ah lagu jowr falo ama caddaalad darro lagu maamulo si loogu fushado dano gaar ah.

## 3.6 Ergada Shirka iyo Ansixinta Dastuurka

23kii Luulyo 2025 waxaa si rasmi uu u furay Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Shirweynihii Ergada. Kulanka Ergada ayaa ka dhacay Hotel Jidbaale ee magaalada Laascaano. Tirada ergada la diiwaangeliyey waxa ay aheyd 432 ergo oo ka kala yimid gobollada, Sool, Sanaag, Ceyn iyo Qurbaha. Ergada shirweynaha oo ka dooddayey qodobo muhiim ah, doodaha oo socday muddo todoba maalmood ah ayaa waxaa lagu lafa guray qodobadii la horkeenay shirweynaha. Ergada ayaa loo qeybiyey todoba kooxood, waxa ay koox weliba ka dooddayeen qodobo dastuuri ah sida; Magaca Dowlad Goboleedka, Calanka, Caasimadda, Tirada Xildhibaanana Dowlad Goboleedka, Caasimadda Ganacsiga, iyo qodobo kale.

Kooxo ayaa Ergada loo qeybiyay, koox weliba waxa ay si gooni ah uga doodday dhammaan cinwaannada aan kor ku soo xusnay. Waxaa maalin waliba kooxaha laga uruurinayey naatiijada doodahooda, qodobada ay ku heshiiyeen, iyo qodobada ay ku kala aragti duwanaadeen oo ahaa qodobadii la hor dhigay. Guddoonka kooxaha ayaa cod gelinayey qodobada lagu kala aragti duwanaaday, waxa ayna soo gudbinayeen boqoleyda sida loo kala codeeyey. Waxaa nasiib wanaag aheyd in ergada laga helay dad khubaro ah oo takhasus u leh mowduucyada laga dooddayey kuwaa oo ergada u bayaaminayey, fahamsiinayeyna mowduuca laga dooddayey iyo ahmiyadiisa si ay doodda u noqoto mid leysla fahamsan yahay halkaana ay ka soo baxaan talooyin muhiim u ah dhammaystirka dastuurka.

Natiijada doodaha iyo afkaaraha kala duwan ay ururiyeen guddiga farsamada ee heer federaal waxa ay noqotay tallaabo lagu guuleystay. Doodaha ma aheyn kuwo sahlan laakiin waxaa si weyn uga muuqday maskax-shiil iyo furfurnaan. Doodahaa la ururiyey waxaa loo gudbinayey guddiga diyaarinta dastuurka si ay u geliyaan dastuurka.

Guddiga dastuurka waxaa ay si weyn uga mahadceliyeen sida doodaha loo maareeyey, loo ururiyey iyo sida loo qaabeeyey dastuurka. Halkaa waxaa ka soo baxay dastuur aad u wanaagsan oo laga ilaaliyey khaladaadkii farsamo ee ka dhacay dastuurradii dowlad goboleedyada ee hore loo sameeyey.



Guddiga Dastuurkas Ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari ee Soomaaliya

## Ansixinta Dastuurka

Maalintii ansixinta waxaa ku soo xaadiray madasha shirka ergo gaareysa 417 xubnood oo si wadajir ah ugu codeeyay, Magaca Dowlad Goboleedka, Calanka, Caasimadda, Tirada Xildhibaannada Dowlad Goboleedka, Caasimadda Ganacsiga, iyo qodobo kale.





Munaasabaddii Ansixinta Dastuurka waxaa ka hadlay qeybaha kala duwan ee bulshada sida cuqaasha, madax-dhaqameedyada, ururrada dhalinyarada, iyo haweenka. Sidoo kale waxaa ka hadlay Wasiirro, Xildhibaanno, iyo siyaasiyiin. Madaxdii Ergada ee hadashay waxay si xooggan u xoojiyeen in dhismaha maamulka uu noqdo mid loo dhan yahay lana ilaaliyo qoondada dhalinyarada iyo Haweenka 30%. Dhammaan Mas'uuliyiintii hadashay waxa ay caddeeyeen muhiimadda uu leeyahay dowlad goboleedka Waqooyi Bari ee Soomaaliya.

30kii Luulyo 2025, munaasabaddii shirka waxaa si rasmi ah u soo xiray Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta Mudane Cali Yuusuf Cali (Cali Xoosh). Wasiirka waxaa uu hoosta ka xariiqay muhiimadda ay midnimada dalka u leedahay dhisidda Maamul Goboleedka Waqooyi Bari ee Soomaaliya. Sidoo kale muhiimadda uu dhismaha maamulka u leeyahay dadka degaanka iyo adeegooda, taas oo loola jeedo in dowladnimada dadka loo dhaweeyo.




31dii Luulyo 2025, Munaasabaddii loo sameeyey shirweynihii ergada ee dasruurka anxisay waxaa ka soo qeybgalay dad kor u dhaafaya 1000 qof. Munaasabaddan waxaa lagu qabtay Hotel Jabuutaawi ee magaalada Laascaano. Waxaa ka soo qeyb galay dadweyne aad u fara badan oo ay ku jiraan ergadii dastuurka ansixisay, guddiyadii ka shaqeynayay dastuurka, Guddigii Farsamada oo ay dowladda Federaalka u soo dirtay dhammaystirka maamulkii SSC-Khaatumo, Siyaasiyiin, Wisiirro iyo Xildhibaanno ka mid ah labada heer ee dowladda, hoggaamiyaha SSC-Khaatumo iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta ee DFS.

Munaasabaddan waxaa ka hambalyeeyay Garaaddo, Cuqaal, Wakiillo ku hadlayey magaca ergda, Guddoomiyaha baarlamaanka SSC-Khaatumo, Xildhibaanno labada heer dowladeed, Wasiirro Labada Heer Dowladeed. Waxaa warbixin ka jeediyey Guddoomiyaha Guddiga dhammaystirka Maamul Goboleedka SSC-Khaatumo oo ka hadlay muhiimadda uu leeyahay Dastuurka la ansixiyey, iyo faa'iidada uu dadka, midnimada dalka u leeyahay iyo geeddi socodka dowlad dhiska.

Sidoo kale waxaa munaasabadda ka hadlay Wasiirka Arrimaha Gudaha oo bogaadiyay ansixinta dastuurka. Waxaa uu Wasiirku ku baaqay;

- In dhammaan beelaha degaanku si wanaagsan ugu diyaar garoobaan soo xulista xubnaha ay ku yeelanayaan Golaha Wakiillada, iyadoo soo xulistaasi noqonayso mid waafaqsan Dastuurka iyo habraacyada loo dejiyay.
- In xulista xildhibaannada lagu saleeyo hab cadaalad ah, lagu wada jiro, lana ilaaliyo habraacyada rasmiga ah ee lagu heshiiyay si looga fogaado eex iyo khilaaf.
- In isimada, cuqaasha iyo hoggaanka dhaqanku ay dardargeliyaan hannaanka xulista xildhibaannada iyagoo tusaale u noqonaya hoggaan mideeya bulshada oo horseeda dowladnimo waarta.

## 3.7 Geeddi Socodkii Dastuur Yeelashada SSC-Khaatumo

Guddiga Farsamada ee Dhammaystirka Maamul-dhiska Dowlad-goboleedka SSC-Khaatumo isagoo gudanaya waajibaadkiisa shaqo, ayuu horraantii shaqada, wuxuu, maalin kadib markii la magacaabay 5tii Luulyo, billaabay dejinta tubta hannaanka dhammaystirka dhismaha maamulka, isagoo Dastuurka u arkayay tiirka ugu weyn ee dowladnimada laga yagleelayo degaannadan. Guddigu waxa uu ku dadaalay in la helo Dastuurka dowlad-goboleedka cusub oo heshiis lagu yahay, laguna dhisay aragtida iyo rabitaanka dhammaan qaybaha wada dhisanaya dowlad-goboleedka, si uu saldhig adag ugu noqdo sharciyadda dowladda cusub ee la dhisayo.

Hawshaasi waxay ku billaabmatay kulammo uu Guddiga Farsamadu la yeeshay guddigii hore ee maamulka SSC-Khaatumo ee u xulsaarnaa diyaarinta Dastuurka, si loo qiimeeyo dedaalladii ay horay u sameeyeen iyo heerka uu marayo geeddi-socodka qorista iyo diyaarinta dastuurka. Waxaa soo baxday, maadaama uu guddigaasi ka koobnaa xubno ka socday keliya Maamulka ku-meelgaarka ahaa ee SSC-Khaatumo oo ay u baahan yihiin xubno khubaro dheeri ah oo matela bulshada Sanaag-Maakhir. Sidoo kale, Guddiga Farsamadu, wuxuu helay nuqulkii qabya-qoraalka dastuurka si aan u soo akhrino una soo qiimeeyno, wixii talo ee loo baahdo loogu celiyo guddiga dastuurka.

Dhanka kale, waxaan kulammo gaar ah la yeelannay dhinacyada siyaasiyiinta iyo hoggaanka dhaqanka ee degaannada Sanaag-Maakhir, si loo xaqiijiyo in Guddiga Madaxa-bannaan ee Diyaarinta Dastuurka (Guddiga Dastuurka) lagu biiriyo xubno si buuxda u matala aragtidooda iyo danahooda siyaasadeed. Intaas waxaa dheer, waxaan helnay qabyo-qoraalka dastuurka ee hore loo diyaariyay, in aan soo akhrino oo aan hubinno waafaqsanaantiisa Dastuurka Federaalka, loona siiyo Guddiga Dastuurka talooyin lagu xaqiijinayo inuusan ka hor-imaan Dastuurka Federaalka, isla markaana uu la jaanqaadayo mabaadii'da dowladnimada iyo Shareecada Islaamka.

## Dhismaha Guddiga Diyaarinta Dastuurka

24[kii] Febraayo 2025, Golaha Wakiillada Maamulka SSC-Khaatumo oo ku dhisaya qodobka 6aad ee Axdiga Maamulka SSC-Khaatumo ayaa ansixiyay Xeerka Dhismaha Guddiga Madaxa-bannaan ee Diyaarinta Dastuurka, guddigaas oo u xilsaaran hoggaaminta geeddi-socodka diyaarinta dastuurka cusub ee Maamulka SSC-Khaatumo, qabashada latashiyada dadweynaha iyo qorista dastuurka dowlad-goboleedka.

Dhaqangalkii xeerka dhismaha Guddiga dabadeed, hoggaamiyaha maamulka SSC-Khaatumo waxa uu, 14[kii] Maarso 2025, magacaabay Guddiga Diyaarinta iyo Hoggaaminta Wadatashiyada Dastuurka, oo ka kooban 15 xubnood oo laga soo dhex xulay qaybaha kala duwan ee bulshada, si loo hubiyo in hannaanka dastuur-samayntu noqdo mid ka tarjumaya aragtida iyo rabitaanka bulshada oo dhan. Guddigaas waxaa ansixiyay Golaha Baarlamaanka SSC-Khaatumo 19[kii] Maarso 2025.

Si loo xaqiijiyo wada lahaansha buuxa iyo in aragtida bulshada degaannada dowladda wada dhisanaya ee ka maqan Guddiga Dastuurka, ayaa Guddiga Farsamadu wuxuu kulamo latashi la yeeshay siyaasiyiinta iyo madaxda dhinaca bulshada Sanaag-Maakhir isagoo talo ka siiyay kana dhageystay aragtidooda ku aaddan dastuurka cusub ee uu dowlad-goboleedku yeelan doono. Kulamadaas kadib, 21[kii] Luulyo 2025, waxaa xubnihii horey u jiray lagu daray toddobo xubnood oo ka socday degaannada Sanaag-Maakhir. Isku-dhafkaan cusub wuxuu dhammaystir u noqday Guddiga Dastuurka iyo mideynta aragtiyaha kala duwan, isla markaana xaqiijiyay isku dheellitirka wada lahaanshaha qaybaha dowlad-goboleedka wada dhisanaya.

## Hannaanka Diyaarinta Dastuurka

Guddiga Dastuurka ayaa muddo shan bilood ah si joogto ah u shaqeeynayey oo qabtay hawlo qoto dheer oo qorshaysanaa oo loo maray habraacyo farsamo iyo shaqo kooxeedyo kala duwan. Guddiga oo markii hore ka koobnaa 15 xubnood oo lagu soo biiriyay 7 xubnood oo kale, kuwaas oo isku jiray sharci-yaqaanno, khubarro farsamo iyo matelaad bulsho, si loo hubiyo in dastuurka la diyaarinayo uu u noqdo mid tayo sare leh oo ka tarjumaya rabitaanka iyo danaha guud ee bulshada wada dhisanaya dowlad-goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.

Guddiga Dastuurku wuxuu hirgeliyay laba nooc oo latashiyada bulshada ah, kuwaas oo saldhig u noqday helista aragtiyo iyo talooyin lagu qiimeyn karo rabitaanka iyo danaha bulshada, looguna gogol xaaray in dastuurka uu yeesho taageero ballaaran ee bulshada iyo ka jawaabidda danahooda dhabta.

Dadweynaha ayaa lala yeeshay latashiyo toos ah iyada oo loogu bandhigay qodobo muhiim u ah dastuurka oo ay ka mid ahaayeen magaca dowlad-goboleedka, astaamaha aqoonsiga iyo qodobbo kale ee muhiim u ah nidaamka maamulka. Ujeeddadu waxay ahayd in shacabku si toos ah uga dhiibtaan talooyinkooda, isla markaana ay helaan fursad ay aragtidoodda qaybaha muhiimka ah ee dastuur-yeelashadooda ku soo bandhigi karaan. Habkan tooska ah wuxuu dhiirrigeliyay ka-qaybgalka dadweynaha iyo xoojinta xiriirka u dhexeeya Guddiga iyo bulshada.

Waxaa intaa dheer, guddigu wuxuu qabtay kulammo iyo dood-wadaagyo gaar ah lala yeeshay qaybaha bulshada sida bahda dhaqanka, culumada, aqoonyahannaa, ururrada iyo qaybaha kale ee muhiimka ah ee bulshada. Ujeeddada latashiyadan waxay ahayd in la helo aragtidooda iyo talooyinkooda ku saleysan khibradda iyo fahamka hoggaanka dhaqanka, aqoonyahanka iyo bulshada rayidka ah, taas oo muhiim u ahayd in dastuurku noqdo mid loo dhan yahay oo ka turjumayo aragtida iyo rabitaanka bulshada.

Guddigu wuxuu sameeyay cilmi-baarisyo diiradda lagu saaray mowduucyada aasaasiga u ah Dastuurka, oo ay ka mid yihiin: xiriirka u dhexeeya Dastuurka iyo Shareecada Islaamka, kala soocidda awoodaha laamaha dowladda, madax bannaanida garsoorka, mabaadi'da maamul wanaagga iyo doorka guddiyada iyo hay'adaha madaxa bannaan. Cilmi-baarisyada oo lagu sameeyay isbarbardhig sharciyeed iyo waayo-aragnimo dowlad-dhis oo laga soo ururiyey ilo kala duwan sida dastuurrada dowlad-goboleedyada, Dastuurka Federaalka, iyo dalka kale, iyo kutubbada fiqiga Islaamka ee khuseeya taasoo saldhig u noqotay qoraalka dastuur isku dheelitiran, isla markaana la jaanqaadaya duruufaha dowlad-dhiska degaanka isla markaana waafaqsan Shareecada Islaamka.

Guddiga Dastuurku wuxuu si joogto ah u qabtay doodo shaqo oo guddiga dhexdiisa ah, kuwaas oo aqoon iyo xirfad sharci ku dhisan. Doodahan ayaa ujeedkoodu ahaa in lagu mideeyo aragtiyaha kala duwan ee xubnaha guddiga, iyadoo la isku keenay waayo-aragnimo sharci, aqoon bulsho, faham siyaasadeed iyo faham shareecada Islaamka ku qotoma, si loo abuuro qodobbo sharci oo dhammaystiran oo isku dheelitiran.

Guddiga Farsamada wuxuu door muhiim ah ka qaatay hubinta in qabyo-qoraalka Dastuurka dowlad-goboleedka uu noqdo mid aan ka horimaaneyn Dastuurka Federaalka iyo Shareecada Islaamka. Intii uu socday geeddi-socodka qorista Dastuurka, Avv Arafat Ali oo xubin ka ah Guddiga Farsamada, ayaa qayb ka ahaa

doodaha uu Guddiga Dastuurku ka yeeshay qabyo-qoraalka dastuurka isagoo ku biiriyay talooyin sharci iyo kuwa nidaam oo hagaya toosinta qodobbada, hagaajinta qaab-dhismeedka iyo saxidda ereybixinta sharci si qoraalka dastuurka uu u noqdo mid dhammaystiran oo si sahlan loo fahmi karo.

**Habka bandhigga iyo ansixinta Dastuurka**

Guddiga Madaxa-bannaan ee Diyaarinta Dastuurka ayaa ergada u soo bandhigay qabya-qoraalka Dastuurka, si ay uga doodaan ka dibna u ansixiyaan. Shirka oo ahaa maalintii 6aad ee Shirweynaha Ergada wuxuu qabsoomay 30 Luulyo 2025 iyadoo ergada oo ka koobnayd 432 xubnood, ay mudda shan maalmood ah si qoto dheer uga soo doodeen oo soo loo lafa-gureen qodobbada aasaasiga ah ee Dastuurka, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen: magaca dowladda, astaanta dowladda, caasimadda maamulka, caasimadda dhaqaalaha, mabaadi'da aasaasiga ah ee dowladnimada, xuquuqda iyo waajibaadka muwaadinka, qaab-dhismeedka dowladda iyo nidaamka Xukuumadda, madax-bannaanida garsoorka iyo nooca nidaamka garsoor ee ugu habboon dowlad-goboleedka cusub, iyo qodobo kale oo muhiim u ah dhismaha dowladnimo sharciyad iyo nidaam sal adag leh. Natiijadii doodahas ayaa lagu soo daray qabyo-qoraalka Dastuurka.

Billowgiiba, Guddiga Madaxa-bannaan ee Diyaarinta Dastuurka, ayaa soo bandhigay qabyo-qoraalka Dastuurka. Bandhiggaas waxaa goob joog ka ahaa 20 xubnood oo ka mid ahaa 21-ka xubnood ee guddiga, waxaana warbixin hordhac ah oo faahfaahinaysay dhismaha guddiga, isku dhafka xubnaha iyo habka ay u soo shaqeeyeen jeediyay Guddoomiyaha Guddiga, Dr. Cabdinaasir Maxamed Barre "Abuushaybe". Waxaa sidoo kale warbixin ka hadlaysay astaamaha uu dastuurku leeyahay jeediyay Dr. Cabdullaahi Cabdiraxmaan Maxamuud "Suldaan Shabeelle", warbixintaas oo uu ku faahfaahiyay sida Dastuurku uu uga duwan yahay uuna kaga wanaagsanyahay Dastuurada dowlad-goboleedyada kale iyo kan Federaalka, sida waafajinta Shareecada Islaamka, kala soocidda awoodaha xeer-dejinta, fulinta iyo garsoorka, adkeynta madax-bannaanida garsoorka, iyo habka wax-ka-beddelka dastuurka loo marayo oo la adkeeyay.

Ka dib kelmadahaas hordhaca ah, Xildhibaan Axmed Cabdi Cali-shire ayaa ergada u dulmaray dhammaan qodobada dastuurka oo ka kooban 152 qodob iyo lifaaqyo, isagoo si gaar ah u soo bandhigay calanka iyo astaanta dowladda.

Markii uu dulmarku soo ilaaday, ergada waxaa loo bandhigay in ay u codeeyaan magaca loo bixanayo dowlad-goboleedka, iyadoo loo kala codeeyay laba magac ee la soo jeediyay:

- SSC-Maakhir; iyo
- Waqooyi Bari Soomaaliya.

Waxaa codeeyay 417 ergo oo goob joog ahayd, kuwaas oo 348 cod ku oggolaaday magaca "Waqooyi Bari Soomaaliya," halka 69 cod uu helay magaca "SSC-Maakhir."
Ka dib ansixinta magaca dowlad-goboleedka, ayaa dhammaan 417 ergo ee goob joogta ahayd waxay cod aqlabiyad buuxda ah ku oggolaadeen Dastuurka, taas oo ka dhigeysa in uu si rasmi ah u ansaxay, sida uu dhigayo Qodobka 151-aad ee Dastuurka.

**Lifaaqyada Warbixinta**
**Lifaaqa 1aad: Talooyinka Sharci ee Qabyo-qoraalka Dastuurka**
**Lifaaqa 2aad: Soo jeedinta Qodobbada Cutubka Kala Guurka**
**Lifaaqa 3aad: Soo jeedin ku aaddan kaabis qodobka ansixinta Dastuurka**

# CUTUBKA 4aad: WAJIGA 3aad EE XULISTA GOLAHA WAKIILLADA IYO DOORASHADA GUDDOONKA GOLAHA

## 4.1 Horudhac

Cutubkani wuxuu sharraxayaa wajigii saddexaad ee dowlad-dhiska, kaas oo ahaa soo xulista iyo ansixinta xubnaha Golaha Wakiillada (Baarlamaanka). Waxaa lagu faahfaahinayaa magacaabistii Guddiga Hubinta iyo Ansixinta 3-dii Agoosto 2025, habraacyadii la maray ee xulista 83-da xildhibaan, iyo caqabadihii la kulmay, gaar ahaan xaqiijinta qoondada haweenka ee 30%. Cutubku wuxuu ku soo gabagabeynayaa ku dhawaaqistii liiska rasmiga ah ee xildhibaannada 17-kii Agoosto 2025, dhaarintoodii, iyo doorashadii Guddoonka Golaha Wakiillada oo dhacday 23-kii Agoosto 2025.

## 4.2 Magacaabista Guddiga Hubinta yo Ansixinta Xubnaha Golaha Wakillada

3dii Agoosto, 2025ka, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshlisiinta ee Xukuumadda JFS wuxuu magacaabay Guddiga Hubinta yo Ansixinta Xubnaha Golaha Wakillada ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.

Xubnaha Guddiga Hubinta yo Ansixinta Xubnaha Golaha Wakillada ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya waxaa ay yihiin:

| | |
|---|---|
| 1. Cabdinaasir Axmed Qaybdid | Guddoomiye |
| 2. Cabdirisaaq Faarax Warsame | Guddoomiye Ku-Xigeen |
| 3. Cabdulgaadir Ibrahim Ciise | Xoghaye |
| 4. Ismaaciil Sheekh Saalax Axmed | Xubin |
| 5. Mahdi Siciid Xasan | Xubin |
| 6. Sugulle Cabdi Xaabsade | Xubin |
| 7. Cabdiraxmaan Axmed Xaaji Diiriye | Xubin |

**Waajibaadka guddigan waxaa ka mid ah:**

1. Xaqiijinta iyo hubinta xulista Xubnaha Golaha Wakiillada ayadoo la raacayo habraaca xulista xubnaha Golaha Wakillada.
   - Fududeynta kulamada iyo wada-hadallada lagu hubinayo anisixinta iyo xallinta khilaafaadka.
   - Dhiirrigelinta midnimada beelaha yo hagidda hannaan loo dhan yahay.

Guddiga Fasamo waxa uu diyaariyay waajibaadka shaqo ee guddiga cusub iyo habraaca si ay ugu hawlgalaan sida ugu dhakhsiyaha badan.

4tii Agoosto, 2025, Guddiga Farsamo waxa uu la kulmay Guddiga Hubinta yo Ansixinta Xubnaha Golaha Wakillada ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari si ay ugu sharraxaan waajibaadkooda shaqo iyo habraaca xulista xubnaha Golaha Wakiillada Waqooyi Bari.







Kulankaas iyo tababrkaas waxa uu fududeeyay in Guddiga Hubinta iyo Ansixinta xubnaha Golaha Wakiillada Waqooyi Bari ay 5ta bisha Agoosto 2025 guda galaan qabashada waraaqaha cuqaasha ay ku soo xuleen xildhibaannada cusub ee Waqooyi Bari. Sidoo kale, Guddiga Farsamo waxa uu diyaariyay 5ta bisha Agoosto 2025 liis hubinta ee lagu xaqiijinayo in xubnaha Golaha Wakiillada ay buuxiyaan shuruudaha ka mid noqoshada xubinnimada Golaha Wakiillada ee Dawld Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.

**Foomka Habraaca Hubinta Dokumentiga Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya (2025-2030)**

| # | QODOBKA | HAA | MAYA |
|---|---|---|---|
| 1 | Warqadda Go'aanka Guddiga Hubinta iyo Ansixinta | ☐ | ☐ |
| 2 | Warqadaha Isimka/Cuqalka ee go'aan gaarista xubinnimada | ☐ | ☐ |
| 3 | Warqadda Sooyaalka shaqo (CV) | ☐ | ☐ |
| 4 | Warqadda danbi la'aanta CID | ☐ | ☐ |
| 5 | 6 Sawir oo sawir passport ah | ☐ | ☐ |
| 6 | Warqadda qidmad bixinta xildhibaanka | ☐ | ☐ |
| 7 | Kaarka Aqoonsiga Qaranka ama wax u dhigma | ☐ | ☐ |

Guddiga Farsamo waxaa kale oo uu u diyaariyay Guddiga Hubinta iyo Ansixinta xubnaha Golaha Wakiillada Waqooyi Bari foomamka hubinta iyo ansixinta, foomka dacwo qabashada, foomka go'aan gaarista dacwadda, iyo foomka racfaanka haddii uu dacwo waduhu ku qanci waayo go'aanka guddiga.

Guddigu waxa uu 6dii Agoosto 2025, ugu tagay Guddiga Hubinta iyo Ansixinta xubnaha Golaha Wakiillada Waqooyi Bari goobta ay ku hawlgalyeen si ay ugu tababaraan foomamka ay soo diyaariyeen. Tababarkaasi waxa uu ku dhammaday si hufan.

Intaas waxaa dheer, in Guddiga Farsamo intii ay joogeen goobta shaqada ee Guddiga Hubinta iyo Ansixinta arkeen in hanaanka qabashada codsiyada, kala xulista xubnaha, xaqiijinta saxsanaanta xubnaha iyo cuqaasha, iyo soo gudbinta xubnaha saxda ay u baahan tahay in si isxigxiga oo leh qorshe hawlgal oo kala dambeeya loo hawgaliyo. Qiimayntaas ka dib, Guddiga Farsamo waxa uu u xulay xubno si joogto ula falgala Guddiga Hubinta iyo Ansixinta si loo dardargaliyo hawlaha xulista xubnaha Golaha Wakiillada ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya ee 2025ta ilaa 2030ka.

**Shaxda Golaha Wakiillada Iyo Beelaha ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya**

| BEESHA | TIRADA | CAAQILKA | ISIMKA |
|---|---|---|---|
| **Beesha Maxamuud Garaad** | **14** | | |
| Jaamac Siyaad | 5 | | |
| Ugaadhyahan/Cumar Wacays | 1 | | |
| Ugaadhyan/Naaleeye Axmed | 6 | | |
| Ugaadhyahan Nuur Axmed | 2 | | |
| **Beesha Faarax Garaad** | **13** | | |
| Bahrarsame | 4 | | |
| Barkad | 4 | | |
| Axmed Garaad | 6 | | |
| **Beesha Baha-nugaaleed** | **13** | | |
| Xasan Ugaas | 2 | | |
| Xaamud Ugaas | 1 | | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Maxamuud Ugaas | 1 | | |
| Qayaad | 2 | | |
| Hayaag | 2 | | |
| Khaalid | 2 | | |
| Maxamed Muuse | 1 | | |
| Yaxye | 2 | | |
| Beesha Fiqishinni | **3** | | |
| Beesha Madhibaan | **1** | | |
| Beesha Gari Koombe | **1** | | |
| **Beesha Maxamuud Harti** | **31** | | |
| Warsangali, Cumar | 18 | | |
| Warsamgali, Dubays | 10 | | |
| Warlabe | 2 | | |
| Ogeyslabe | 1 | | |
| Hinjiye | 1 | | |
| Beesha Tiinle | 1 | | |
| Beesha Gahayle | 1 | | |
| Beesha Kaskiiqabe | 1 | | |
| Beesha Naaleeye Axmed | 2 | | |
| **ISKU DARKA** | **83** | | |







**Qoondada Haweenka**

Si kor loogu qaado qoondada haweenka, looguna qareemo dumarka daneenaya in ay ka mid noqdaan xubnaha Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari, Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka ee Dawlaad Goboleedka Waqooyi bari Suhuur Faysal Barre, ayaa 6dii Agoosto 2025 magacawday Guddiga Daba-galka Qoodada haweenka ee xubnaha Golaha Wakiillada ee 2025 ilaa 2030. Guddigan ayaa ka kooban xubnaha soo socda:

1. Guddoomiye — Caasha Axmed Cabdalle
2. Guddoomiye Ku-xigeen — Canab Xasan Cilmi
3. Luul Cali Nuur — Xoghaye
4. Ruqiya Faarax bacood — Xubin
5. Ifraax Cali Yasir — Xubin
6. Nimco Ciise Nuur — Xubin

Guddiga Farsamo ayaa kulan deg deg ah le yeeshay Guddiga Danjirayaasha Qoondada Haweenka oo waajibkoodu yahay sidii loo xaqiijin lahaa in qoondada boqolkiiba 30% ee xubnaha Golaha Wakiillada ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari laga dhabeeyo. Qoondada boqolkiiba 30% waxaa tixraac u ah Habraaca Xulista Xubnaha Golaha Wakiillada Waqooyi Bari ee Doorashada Dadban ee 2025 iyo Xeerka Doorashooyinka Qaranka ee heer Federaal ee 2024, Qodobkiisa 3aad, Farqadiisa (h) oo damaanad qaadaysa qoondada haweenka ee boqolkiiba soddon (30%) ee goloyaasha la isku dooro.

Si looga dhabeeyo arrinkaas, labada guddi waxay isla qaateen hawlo deg deg ah oo muhiim u ah in lagu fuliyo timaadada dhaw. Hawlahaas waxaa ka mid ah in la wargaliyo Guddiga Hubinta iyo Ansixinta inaysan ansixin kuraas aan lahayn qoondada haweenka oo dhan seddex kursi iyo in ka badan, in looga qareemo qoondada haweenka

goleyaasha dhaqanka, siyaasiyiinta heer federaal, Hoggaamiyaha Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari, iyo in lagu soo bandhigo gaboodfalka lagu hayo qoondada dumarka warbaahinta qaybaheeda kala duwan.




**Kormeerka Maalinlaha ah**

7dii Agoosto 2025, Xubno ka socda Guddiga Farsamo ayaa kormeer shaqo ugu tagay Guddiga Hubinta iyo Ansixinta ee Golaha Wakiillada Waqooyi Bari si ay u ogaadaan heerka xulista xubnaha ay marayaan iyo caqabadaha jira. Guddiga Hubinta iyo ansixinta ayaa u xaqiijiyay Guddiga Farsamo in ay hayaan ku dhawaaad 75 codsi oo isugu jira kuwa khilaaf ka jiro, kuwo cuqaal kala duwan ay u saxiixeen kuraas isku mid ah, kuwo ay ka maqan yihiin qoondadii haweenka, iyo kuwo sugaya in la ansixiyo.



9kii Agoosto 2025, Guddiga Farsamo ayaa kormeer shaqo ugu tagay Guddiga Hubinta iyo Ansixinta Golaha Wakiillada Waqooyi Bari si uu uga taageero ciladaha shaqo ee kala xulista xubnaha soo codsaday xubinnimada Golaha Wakiillada. Guddiga Hubinta iyo Xulista ayaa qabtay ugu yaraan 164 oo codsi oo ay soo saxiixeen caaqillo, isimo, iyo garaado kala duwan. Guddiga Hubinta iyo Ansixinta Xubinnimada ayaa 9kii Agoosto 2025 ku dhawaaqay in maalinta 10ka Agoosto ee 2025 ay xirmi doonto qabashada codsiyada, isla markaasna ay muhiim tahay cuqaasha iyo garaaddada dhimman ay si deg deg ah ku soo xareeyaan codsiyada xubinnimada Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi bari Soomaaliya.





## Kala Xulista Xubinnimada Golaha Wakiillada

Guddiga Hubinta iyo Ansisixta waxay Guddiga Farsamo u sheegeen in qiyaastii boqolkiiba 80% ay fududdahay in la kala xulo xubnaha soo codsaday xubunnimada Golaha Wakiillada halka boqolkiiba 20% ay u baahan yihiin in dib u fiiriyaan habraaca xulista xubinnimada iyo dhaqanka waxqaybsiga beelaha ay ku qaybsanayeen kuraasta heerarka kala duwan ee Dowladnimada.



82 ka mid codsiyada ay isimadu iyo murashixiinta u soo gudbisteen Guddiga Hibinta iyo Ansixinta waxay ka yimaameen Gobolka Sool iyo Buuhoodle. Gobolka Sool iyo Buuhoodle waxaa loo asteeyay 45 xubin. Taasi waxay keenaysaa in 37 xubin oo la soo gudbiyay go'aan laga gaaro sidii loo celin lahaa. Sidoo kale, Gobolka Sanaag oo loo asteeyay 38 xubin, waxay soo gudbisteen 82 murashax. Taasi waxay khasbaysaa in Guddiga Hubinta iyo Ansixinta ay go'aan celis ah ka gaaraan 45 xubin oo cuqaasha, hoggaannada cuqaasha, iyo garaaddadu ay ku hishiin waayeen xubnaha beesha ay u xulayaan Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari.




Xubnaha loo soo gudbiyay Guddiga Xulista iyo Ansixinta waa 164 xubnood oo u sharaxan 83 kursi oo Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari. Habraaca tirada qoondada dumarka waxaa loo asteeyay in boqolkiiba 30% ay Golaha Wakiillada Waqooyi Bari noqdaan dumar. Haddaba, marka la eego tirada xubnaha ee la soo xulay oo dhan 164 xubnood, waxay ahayd in 49 xubnood ay noqdaan dumar halka ay isimadu soo xuleen 13 xubnood oo dumar ah oo kaliya. Arrintaasi waxay bidhaaminaysaa in qoondada dumarka ee boqolkiiba 30% aan la gaari karin haddii aan go'aanka siyaasadeed ee xaqiijinta qoondada aan looga hawgalin si mas'uuliyad wadareed ah.

Ugu dambayn, 11kii Agoosto 2025, Guddiga Farsamo ayaa talooyin farsamo siiyay Guddiga Hubinta iyo Ansixinta si loo shaaciyo liiska xubnaha Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari ee 2025 ilaa 2030. Guddiga Farsamo ayaa kula taliyay Guddiga Hubinta inay raacaan Habraaca Xulista isla markaana ka fogaadaan inay ansixiyaan xubin la isku haysto oo dhalin kara gacan ka hadal bulsho. Sidoo kale, waxay Guddigu kula taliyeen in Guddiga Ansixintu iyo Hubinta soo hormariyaan xubnaha aan la isku haysan si loo gaaro kooramka furitaanka koowaad ee Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.

**Xubnaha Golaha Wakiilada**

17ka Agoosto 2025, Guddiga Hubinta iyo Ansixinta xubnaha Golaha Wakiillada Dowlad-goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya ayaa ku dhowaaqay xubnaha Golaha Wakiillada Dowlad-goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya ee muddada 2025–2030.

**Liiska Rasmiga ah ee Xildhibaannada Golaha Wakiillada – D.G Waqooyi Bari Soomaaliya (2025 – 2030)**

| Tirsi | Magaca Xildhibaanka | Jinsiga | Gobolka |
|---|---|---|---|
| 1. | Xildhibaan Maxamed Maxamuud Cismaan | Lab | Sanaag |
| 2. | Xildhibaan Siciid Dalmar Faarax | Lab | Sanaag |
| 3. | Xildhibaan Shaafici Maxamed Cali | Lab | Sanaag |
| 4. | Xildhibaan Axmed Cali Maxamed | Lab | Sanaag |
| 5. | Xildhibaan Maxamuud Aadan Faarax | Lab | Sanaag |
| 6. | Xildhibaan Cabdifataax Xassan Aadan | Lab | Sanaag |
| 7. | Xildhibaan Sahal Cabdi Maxamed | Lab | Sanaag |
| 8. | Xildhibaan Axmed Cabdi Xassan | Lab | Sanaag |
| 9. | Xildhibaan Maxamed Cabdilaahi Ibrahim | Lab | Sanaag |
| 10. | Xildhibaan Axmed Maxamuud Cumar | Lab | Sanaag |
| 11. | Xildhibaan Amran Axmed Xassan | Dhedig | Sanaag |
| 12. | Xildhibaan Cabdicasiis Cabdilaahi Maxamed | Lab | Sanaag |
| 13. | Xildhibaan Xaliimo Axmed Cismaan | Dhedig | Sanaag |
| 14. | Xildhibaan Saalax Jaamac Xirsi | Lab | Sanaag |
| 15. | Xildhibaan Maxamuud Cumar Axmed | Lab | Sanaag |
| 16. | Xildhibaan Faysal Xaashi Cumar | Lab | Sanaag |
| 17. | Xildhibaan Axmed Maxamed Axmed | Lab | Sanaag |
| 18. | Xildhibaan Axmed Siciid Faarax | Lab | Sanaag |
| 19. | Xildhibaan Maxamed Maxamuud Ducaale | Lab | Sanaag |
| 20. | Xildhibaan Makhtal Siciid Maxamed | Lab | Sanaag |
| 21. | Xildhibaan Muna Cabdilaahi Maxamed | Dhedig | Sanaag |
| 22. | Xildhibaan Maxamuud Maxamed Saalax Maxamuud | Lab | Sanaag |
| 23. | Xildhibaan Axmed Cabdi Xassan | Lab | Sanaag |
| 24. | Xildhibaan Maxamed Cabdi Shire | Lab | Sanaag |
| 25. | Xildhibaan Cabdiqani Cali Ismaciiil | Lab | Sanaag |
| 26. | Xildhibaan Axmed Cali Xuseen | Lab | Sanaag |
| 27. | Xildhibaan Axmed Cabdiqaadir Axmed | Lab | Sanaag |
| 28. | Xildhibaan Siciid Cabdiraxman Colaad | Lab | Sanaag |
| 29. | Xildhibaan Cabdisalaan Cabdilaahi Maxamed | Lab | Sanaag |
| 30. | Xildhibaan Cabdiraxmaan Daahir Siciid | Lab | Sanaag |
| 31. | Xildhibaan Cabdikani Cabdilaahi Cabdiraxmaan | Lab | Sanaag |
| 32. | Xildhibaan Cabdi Ismaaciil Axmed (Burkuud) | Lab | Sanaag |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 33. | Xildhibaan Khaalid Siciid Saalax | Lab | Sanaag |
| 34. | Xildhibaan Saadiq Jaamac Muuse | Lab | Sanaag |
| 35. | Xildhibaan Ismaaciil Cabdi Maxamuud Guutaale | Lab | Sanaag |
| 36. | Xildhibaan Yaasiin Maxamed Cigaal | Lab | Sanaag |
| 37. | Xildhibaan Jibriil Ciise Duulane | Lab | Sanaag |
| 38. | Xildhibaan Cabdirisaaq Ibraahim Aadan | Lab | Cayn/Togdheer |
| 39. | Xildhibaan Siciid Ibraahim Axmed | Lab | Cayn/Togdheer |
| 40. | Xildhibaan Cabdixakiin Jaamac Dalmar | Lab | Cayn/Togdheer |
| 41. | Xildhibaan Maxamuud Cismaan Nuur | Lab | Cayn/Togdheer |
| 42. | Xildhibaan Maxamuud Cabdiraxmaan Yuusuf | Lab | Cayn/Togdheer |
| 43. | Xildhibaan Guuleed Maxamed Nuux | Lab | Cayn/Togdheer |
| 44. | Xildhibaan Xassan Cabdi Ismaaciil | Lab | Cayn/Togdheer |
| 45. | Xildhibaan Cawil Cumar Faarax | Lab | Cayn/Togdheer |
| 46. | Xildhibaan Saleebaan Aadan Cilmi | Lab | Cayn/Togdheer |
| 47. | Xildhibaan Maxamuud Axmed Ibrahim | Lab | Cayn/Togdheer |
| 48. | Xildhibaan Mukhtaar Axmed Maxile Jaamac | Lab | Cayn/Togdheer |
| 49. | Xildhibaan Cabdirisaaq jaamac Warsame | Lab | Cayn/Togdheer |
| 50. | Xildhibaan Mubaarak Cumar Cabdiwaaxid | Lab | Cayn/Togdheer |
| 51. | Xildhibaan Maxamed Maxamuud Cali | Lab | Cayn/Togdheer |
| 52. | Xildhibaan Daahir Cabdirisaaq Axmed (Ingaydh) | Lab | Cayn/Togdheer |
| 53. | Xildhibaan Xamse Cabdilaahi Maxamuud | Lab | Cayn/Togdheer |
| 54. | Xildhibaan Mohamed Nuur Cali | Lab | Sool |
| 55. | Xildhibaan Cabdixamiid Daahir Maxamed | Lab | Sool |
| 56. | Xildhibaan Cabdiraxmaan Cabdi Xaaji Faarax | Lab | Sool |
| 57. | Xildhibaan Khadar Saleebaan Cabdi | Lab | Sool |
| 58. | Xildhibaan Cali Diiriye Ducaale | Lab | Sool |
| 59. | Xildhibaan Cabdinaasir Maxamed Cawil | Lab | Sool |
| 60. | Xildhibaan Cabdirisaaq Cismaan Oogle | Lab | Sool |
| 61. | Xildhibaan Mahdi Cabdiraxmaan Cilmi | Lab | Sool |
| 62. | Xildhibaan Fahiima Yuusuf Quuje | Dhedig | Sool |
| 63. | Xildhibaan Maxamed Xassan Ismaaciil | Lab | Sool |
| 64. | Xildhibaan Maxamuud Salaad warsame | Lab | Sool |
| 65. | Xildhibaan Cabdirisaaq Cali Xuseen | Lab | Sool |
| 66. | Xildhibaan Cabdrisaaq Warsame Xayir | Lab | Sool |
| 67. | Xildhibaan Axmed Cabdi Cali Shire | Lab | Sool |
| 68. | Xildhibaan Cabdikadir Cabdi warsame | Lab | Sool |
| 69. | Xildhibaan Cabidkadir Abshir Diirye | Lab | Sool |
| 70. | Xildhibaan Jibriil Cali Ciise | Lab | Sool |
| 71. | Xildhibaan Yaasiin Saalax Guuleed | Lab | Sool |
| 72. | Xildhibaan Cali Maxamed Jaamac Jibriil | Lab | Sool |
| 73. | Xildhibaan Daahir Mohmed Cumar | Lab | Sool |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 74. | Xildhibaan Cabdirisaaq Maxamed Xaaji Axmed | Lab | Sool |
| 75. | Xildhibaan Cabdi Muuse Axmed | Lab | Sool |
| 76. | Xildhibaan Cabdiqafaar Maxamuud Maxamed | Lab | Sool |
| 77. | Xildhibaan Maxamed muuse Abokor | Lab | Sool |
| 78. | Xildhibaan Aadan Cabdi Xussen | Lab | Sool |
| 79. | Xildhibaan Cabdiqani Khaliif Maxamed | Lab | Sool |
| 80. | Xildhibaan Faarax Jaamac Cabdicasiis | Lab | Sool |
| 81. | Xildhibaan Cabdikariim Cali Yusuf | Lab | Sool |
| 82. | Xildhibaan Cabdisahal Jaamac Maxamed | Lab | Sool |
| 83. | Xildhibaan Aadan Cabdilaahi Aw-xassan | Lab | Sool |

Xildhibaannada ayaa 17ka Agoosto 2025 la Guddoonsiiyay shahaadada rasmiga ah ee Golaha Wakiillada ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari kuwaas oo ay soo gudbiyeen Guddiga Hubinta iyo Anxisinta. Xubnaha waxaa kaloo loo sameeyay ka副rarka aqoonsiga Golaha Wakiillada.



17kii Agoosto 2025, Guddoomiyaha maxkamadda Dowlad Goboleedlka Waqooyi Bari ayaa ku dhaariyay 83da xildhibaan Hoolka Hotel Jidbaale ee Laascaanood.



17ka Aoogsto 2025, Guddiga Farsamo ee Dhammaystirka Dowlad-dhiska Waqooyi Bari ayaa ku wareejiyay Golaha Wakiillada ee la doortay mas'uuliyaddii Dowladnimada. Guddoomiyaha Guddiga Farsamo ayaa u hambalyeeyay xubnaha Golaha Wakiillada una sheegay in maanta wixii ka dambeeya ay yihiin Dowlad Goboleed xubin ka ah Dowladda Federaalka, oo aynan u baahnayn aqoonsi gooni ah. Hadalladii Guddoomiyaha waxaa ka mid ahaa:

*"Hannaanka dhammaysirka ee ka soo bilowday aqoonsigii labada sono ee ku-meelgaarka ahaa, qabashadii shirwaynaha, xulista ergada Sool, Sanaag iyo Buuhoodle, ansixintii dastuurka Waqooyi Bari, xulisitii iyo hubinta xubnaha Golaha Wakiillada, qabsoomidda kulanka koowaad ee Golaha Wakiillada, dhaarinta xildhibaannada, iyo xulista Guddoonka Ku-meel-gaarka ah waxa uu markhaati u yahay in uu dhammaystiran yahay Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya".*




Goluhu waxa uu iska dhex doortay Guddoonka ku-meelgaarka xubinta ugu da'da wayn, kaas oo noqday Xildhibaan Maxamuud Salaad Warsame si uu u gaarsiiyo doorashada Guddoonka Golaha Wakiillada ee rasmiga ah. Guddoomiyuha Ku-meel-gaarka ah, asaga oo go'aanka Golaha Wakiillada fulinaya ayuu magacaabay Guddiga Diyaarinta Doorashada Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari.




18kii Agoosto 2025, Guddoomiyaha Kumeel gaarka ah ee Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya Xildhibaan Maxamuud Salaad Warsame ayaa u

magacaaabay Guddiga Doorashada Guddoonka Golaha Wakiillada xubnaha soo socda:

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Xildhibaan Axmed Cabdi Cali | Guddoomiye |
| 2. | Xildhibaan Cabdi Ismaaciil Axmed Barkuud | Guddoomiye ku-xigeen |
| 3. | Xildhibaan Cabdikariin Cali Ismaaciil | Xoghaye |
| 4. | Xildhibaan Siciid Dalmar Faarax | Xubin |
| 5. | Xildhibaan Maxamed Maxamuud Cali | Xubin |
| 6. | Xildhibaan Guuleed Maxamed Nuux | Xubin |
| 7. | Xildhibaan Axmed Cali Xuseen | Xubin |




Guddiga Doorashada Guddoonka Golaha Wakiilladu waxa uu leeyahay xilalka iyo waajibaadka soo socda:

- In uu diyaariyo habraaca doorashada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Wakiillada si waafaqsan Dastuurka Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.
- In uu soo saaro jadwalka Doorashada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Wakiillada.
- In uu hubiyo in murrashaxiinta u taagan qabashada jagada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Wakiilladu ay buuxiyeen dhammaan shuruudaha ku xusan Qodobka 50aad ee Dastuurka.
- In uu maareeyo qabashada codbixinta, tirinta codadka, iyo soo saarista natiijooyinka rasmiga ah.
- In uu hubiyo in habka doorashadu ku saleysnaato hufnaan, daah-furnaan, iyo caddaalad buuxda.

- In uu si degdeg ah ugu soo gudbiyo Guddoomiyaha Ku-meel-gaarka ah warbixinta rasmiga ah ee doorashada Guddoomiyaha iyo Ku-xigeennada Golaha.

18kii Agoosto 2025, ayaa Qareenka Guddiga Farasamo Abuukaate Arafaat iyo Guddiga Doorashada Guddoonka Golaha Wakiillada ay diyaariyeen habraaca doorashada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Wakiillada si waafaqsan Dastuurka Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.



19kii Agoosto 2025, ayaa Guddiga Doorashada Guddoonka Golaha Wakiillada horgeeyeen Golaha Wakiillada habraaca doorashada Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Wakiillada si loo ansixiyo. Konton iyo shan (55) ka mid ah Golaha Wakiillada ayaa oggolaaday habraaca, halka shan iyo toban (15) ka mid ahna ay ka aamuseen, taasoo ansax ka dhigtay habraaca.

**Doorashada Golaha Wakiillada Waqooyi Bari**

23ka Agoosto 2025, waxaa la qabtay doorashooyinka Guddoonka Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari. Waxaa lagu tartamay jagooyinka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Wakiillada. Guddoomiyaha Golaha waxaa isku soo sharraxay Xildhibaan Aadan Cabdillaahi Aw-xassan iyo Xildhibaan Cabdiqafaar Maxamuud Maxamed. Guddoomiye Ku-xigeenka koowaad waxaa isku soo sharraxay Xildhibaan Axmed Maxamed Axmed iyo Xildhibaan Amran Axmed Xasan, halka uu Guddoomiye Ku-xigeenka labaad uu isku soo sharraxay Xildhibaan Cabdirisaaq Maxamed Xaaji Axmed oo kaliya.

Guddooomiyaha Golaha Wakiillada Waqooyi Bari waxaa ku guulaystay Xildhibaan Aadan Cabdillaahi Aw-xassan oo helay konton iyo sadex (53) cod, halka uu Xildhibaan Cabdiqafaar Maxamuud Maxamed helay sagaal iyo labaatan (29) cod. Hal (1) codna waxaa loo calaamiyay si khaldan (xumaaday). Guddoomiye Ku-xigeenka koowaad waxaa ku guulaystay Xildhibaan Amran Axmed Xasan oo heshay konton iyo todobo (57) cod, halka uu Xildhibaan Axmed Maxamed Axmed helay labaatan (20) cod. Afar xildhibaan waxay ka maqnaadeen codaynta, halka ay labo (2) codna ka xumaadeen.




Sidoo kale, maadaama uu Guddoomiye Ku-xigeenka labaad isku soo sharraxay Xildhibaan Cabdirisaaq Maxamed Xaaji Axmed oo kaliya, waxaa Gollaha oo kooramkoodu ahaa todobaatan iyo sagaal (79) xildhibaan loo waydiiyay inay siiyaan codka kalsoonida ee gacantaaga ah. Dhammaan xildhibaanadu waxay siiyeen codka

kalsoonida Xildhibaan Cabdirisaaq Maxamed Xaaji Axmed oo noqday Guddoomiye Ku-xigeenka labaad ee Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari ee sanadaha 2025 ilaa 2030.



23 Agoosto 2025, Guddoomiyaha Maxkamadda Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari ayaa ku dhaariyay Guddoomiyaha Golaha Wakiillada, Guddoomiye Ku-xigeenka koowaad iyo Guddoomiye Ku-xigeenka labaad dhaarta Dastuuriga ah ee Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari sida uu dhigayo qododka 100aad ee Dastuurka:



*"Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay, in aan dhowro Diinta Islaamka, Dastuurka iyo shuruucda kale ee dalka u yaalla; xilka la ii igmadayna u guto si daacadnimo ah, kana fogaado laaluush, eex, musuqmaasuq iyo wax isdabamarin; diinta, dalka iyo dadkana Lillaahi ugu adeego".*

# CUTUBKA 5aad: WAJIGA 4aad EE DOORASHADA MADAXWAYNAHA IYO MADAXWAYNE KU-XIGEENKA

## 5.1 Magacaabista Guddiga Doorashada Madaxwaynaha iyo Madaxwayne Ku-xigeenka

25kii Agoosto 2025, Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari, Dr Aadan Cabdillaahi Aw-Xasan, waxa uu xubnahan hoos ku xusan u magacaabay Guddiga Doorashada Madaxwaynaha iyo Madaxwayne Ku-xigeenka:

1. Xildhibaan Axmed Cabdi Calishire
2. Xildhibaan Cabdi Ismaaciil Axmed Barkuud
3. Xidhibaan Cabdikariin Cali Ismaaciil
4. Xildhibaan Siciid Dalmar Faarax
5. Xildhibaan Maxamed Maxamuud Cali
6. Xildhibaan Guuleed Maxamed Nuux
7. Xildhibaan Axmed Cali Xuseen

Guddiga Doorashada Madaxwaynaha iyo Madaxwayne Ku-xigeenka waxa uu leeyahay xilalka iyo waajibaadka soo socda:

- In uu diyaariyo habraaca doorashada Madaxwaynaha iyo Madaxwayne Ku-xigeenka, si waafaqsan Dastuurka Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari Soomaaliya.
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
**Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib u Heshiisiinta**
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيد را لية
**وزارة الداخلية للشؤون والمصالحة الفيد رالية**
مكتب الوزير

**Federal Republic of Somalia**
**Ministry of Interior, Federal Affairs & Reconciliation**
Office of the Minister

*Tix: WAGF&D/XW/0599/2025* *Tr: July 05, 2025*

WASAARADDA ARR. GUDAHA, FED. & DIB-U-HESHIISIINTA
05 JUL 2025
BIXID/EXIT

**Ku:** **Gudoomiyaha iyo Xubnaha Guddiga Farsamo ee Dhamaystirka Maaamul Dhiska Dowlad Gobaleedka SSC-Khatumo**

**Ku:** **Hogaamiyaha Maamulka Dowlad Goboleedka SSC-Khatumo**

**Og:** **Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS**

**Og:** **Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**

**Ujeeddo: Magacaabidda Guddiga Farsamo ee Dhamaystirka Maamul dhiska Dawlad Goboleedka SSC-Khatumo**

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta (AGF&D) ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (XJFS),

Markuu arkay: Qodobka 99aad (a), (b), (e) iyo (f) ee Dastuurka KMG ee JFS, oo u oggolaanaya Golaha Wasiirrada iyo Xubnaha Wasiirrada in ay hirgeliyaan siyaasadda qaranka, si gaar ah midda la xiriirta dhismaha maamullada federaalka iyo dib-u-heshiisiinta.

Markuu Tixgaliyay: Habraacyada iyo khibradaha hore ee dhismaha Dawlad Goboleedyada kale iyo kaalinta Wasaaradda AGF&D ee ah fududeeye iyo kormeere farsamo.

Villa Tanzania, 888 Building
Email: minister@moifar.gov.so , minister.moifar@gmail.com web. Moifar.gov.so

Markuu arkay: Go'aannadii ka soo baxay kulankii Golaha Wadatashiga Qaranka ee dhacay 6-7dii May, 2025 oo ay Goluhu isla-qaateen in Dawlad Goboleedka SSC-Khatumo tahay xubin ka mid ah Golaha Wadatashiga Qaran ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, laguna soo dhammaystiro shirweynaha loo ballansanyahay iyada oo la raacayo dastuurka dalka.

Markuu tixgeliyey: Talada Ra'iisul Wasiiraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Markuu arkay: Baahida loo qabo dardargelinta dhamaystirka maamulka Dawlad Goboleedka SSC-Khatumo, taas oo qeyb ka ah geedi-socodka federaalaynta dalka iyo xoojinta maamulka deegaanka.

**Waxa uu Meel-mariyay**

**Qodobka 1aad**

**Xubnaha Guddiga**

Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta ee Xukuumadda JFS; wuxuu magacaabay Xubnaha **Guddiga Farsamo ee Dhamaystirka Maamul dhiska Dawlad Goboleedka SSC-Khatumo.**

| S/N | Magaca Xubnaha Guddiga | Mas'uuliyadda |
|---|---|---|
| 1. | Dr. Axmednuur Maxamed cabdi | **Gudoomiye** |
| 2. | Cabdinasir Xaaji Maxamed | G. Xigeen |
| 3. | Axmed Shire Axmed (Garoon) | Xubin |
| 4. | Carafaat Cali Maxamed | Xubin |
| 5. | Axmed Yuusuf Maxamuud | Xubin |
| 6. | Rufaci Maxamed Salaad | Xubin |
| 7. | Maxamuud Siciid Nuur | Xubin |
| 8. | Fadumo Cabdi Cali | Xubin |

Villa Tanzania, 888 Building
Email: minister@moifar.gov.so , minister.moifar@gmail.com web. Moifar.gov.so

## Qodobka 2aad

## Waajibaadka Guddiga

**Guddigu waxa uu mas'uul ka yahay**

i. Talo-bixinta iyo fududeynta ku saabsan dardargalinta iyo dhamaystirka maamulka Dawlad Goboleedka SSC-Khatumo.
ii. Isku xirka farsamo ee hay'adaha heer federaal & heer dawlad goboleed ee dhamaystirka maamulka Dawlad Goboleedka SSC-Khatumo.
iii. Talabixinta Arrimaha dhismaha hay'adaha maamulka deegaanka iyo siyaasadooda.
iv. Soo diyaarinta warbixinno joogto ah oo la gaarsiiyo Wasaaradda iyo hay'adaha qaybta ka ah dhismaha maamulka Dawlad Goboleedka SSC-Khatumo.

## Qodobka 3aad

## Muddada Shaqada Guddiga

Guddigu waxa uu shaqayn doonaa laga bilaabo taariikhda magacaabista – illaa inta laga dhamaystirayo dhismaha maamulka Dawlad Goboleedka SSC-Khatumo.

## Qodobka 4aad

## La-xisaabtanka iyo Warbixinta

i. Guddiga waxaa si toos ah ula xisaabtamaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta.
ii. Guddigu waxa ay soo gudbin doonaan warabixinno qoraal ah oo bille ah, iyadoo la tixraacayo horumarka hawlgalka guddiga.

Villa Tanzania, 888 Building
Email: minister@moifar.gov.so , minister.moifar@gmail.com web. Moifar.gov.so

## Qodobka 5aad

## Dhaqan galka Guddiga

Magacaabiddani waxa ay dhaqan-gelaysaa marka uu saxiixo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, federaalka iyo Dib u heshiisiinta ee Xukuumadda JFS, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Fulin Wacan,**

**Xil. Cali Yusuf Cali – Xoosh**
**Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha**
**Federaalka iyo Dib u Heshiisiinta**

Villa Tanzania, 888 Building
Email: minister@moifar.gov.so , minister.moifar@gmail.com web. Moifar.gov.so

## 4. Warsaxaafadeedka DFS ee garab istaagga dadka SSC-Khaatumo

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib u Heshiisiinta

جمهورية الصومال الفيد را لية
وزارة الداخلية والشؤن الفيدرالية والمصالحة

Federal Republic of Somalia
Ministry of Interior, Federal Affairs & Reconciliation

**WARSAXAAFADEED**

**Muqdisho, 19 Oktoober 2023**

Xukuumadda Federaalku ayadoo gudanaysa mas'uuliyadda iyo waajibaadka ka saaran wadajirka iyo isu-haynta dalka, waxay martiqaadday hoggaamiyaha maamulka ku meel gaarka ah ee SSC-Khaatumo iyo wafdi uu hogaaminayo. Si wada tashi looga yeesho xaaladda degaanka iyo guud ahaan dalka. Doodo iyo falanqayn dheer oo taabanayey xaaladaha siyaadadeed, amni, bani'aadamnimo ka dib, waxaa la isla qaatay:

1. Xukuumadda Faderaalku waxay mar labaad taageeraysa go'aaNadii issimada dhaqanku ay shirweynahoodii Laascaanood ka soo saareen 06/02/2023, Ayadoona soo dhaweynaysa isla markaana la shaqaynaysa maamulka ku meel gaarka ah ee dadka deegaanku ay dhisteen.

2. Xukuumadda Federaalki waxay mar kasta ku baaqaysaa gacanna ay ka geysanaysaa dadaal kasta oo nabad iyo xasilooni ku soo dabaalaya deegaankaas. Ayadoo wixii khilaaf ah ee jirana lagu xallinayo wadahadal iyo wada-xaajood. Waxayna maamulka SSC Khaatumo ku bogaadineysaa sida ay diyaarka ugu yihiin xabbad joojinta iyo nabad ku wada noolaashaha.

3. Dowladda federalka Soomaaliya waxay ugu baaqeysaa Somaliland iyo maamulka SSC Khaatumo Xabad joojin iyo inay sii-daayan Maxaabiista ay kala hayaan, Waxayna xukumadda federalka diyaar u tahay inay fududeyso hawlaha arrintaas la xiriira..

4. Xukuumadda Federaalku ayadoo ka duulaysa mas'uuliyadeeda waxay si degdeg ah uga hawlgalaysaa dib u soo noolaynta iyo tayaynta adeegyada bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha iyo guud ahaan arrimaha bani'aadamnimada.

5. Xukuumadda Fedaraalku waxay ugu baaqeysaa hey'adaha dawladda, bulshada Soomaaliyeed iyo Beesha caalamka in gargaar bani'aadnimo oo degedeg ah lala gaaro deeganadaas.

**#DHAMMAAD#**

Via Tanzania, 888 Building, Waberi District, Mogadishu-Somalia

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

GOLAHA WADATASHIGA QARAN (GWQ)

**WAR-MURTIYEED**

**6- 7 May 2025**

**MUQDISHO**

1. **Hordhac**

Shirka Golaha Wadatashiga Qaranka (GWQ) oo uu shir guddoomiyay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud ayaa lagu qabtay Magaalada Muqdisho October 6-7 May 2025. Shirka oo qayb ka ah shirarka wadatashiga ee Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uu hore ugu baaqay, waxaa ka soo qaybgalay Ra'iisul Wasaaraha XJFS Mudane Xamza Cabdi Barre, Ra'iisul Wasaare K/xigeenka XJFS Mudane Saalax Axmed Jaamac, Madaxweynaha Koonfur Galbeed Mudane Cabdicasiis Xasan Maxamed (Lafta-gareen), Madaxweynaha Galmudug Mudane Axmed Cabdi Kaariye (Qoor-qoor), Madaxweynaha Hirshabeelle Mudane Cali Cabdullaahi Xuseen (Cali Guudlaawe), Guddoomiyaha Gobalka Banaadir ahna Duqa Muqdisho Mudane Maxamed Axmed Amiir iyo Hogaamiyaha Dowlad Gobaleedka SSC-Khaatumo Mudane Cabdiqaadir Axmed Aw-Cali.

1. **Warbixin**

GWQ waxa uu warbixino faahfaahsan ka dhagaystay:

a. La-taliyaha Amniga Qaranka oo golaha uga waramay xaalada dagaalka lagula jiro argagixisada iyo qorshaha looga nadiifinayo goobaha ay dhawaanahan xasilooni darada ka wadeen.

b. Gudoomiyaha Guddiga Doorashada oo si faahfaahsan uga waribixiyay habsami u-socodka diiwaangelinta cod bixiyaasha, iyo diyaargarowga guud ee ka billaabmay Gobolka Banadir.

**2. Bogaadin:**

a. GWQ waxa uu u hambalyeeyay geesiyada ciidamada qaranka iyo xoogaga difaaca bulshada guulaha ay ka gaareen la dagaalanka argagaxisada, sida oo kale waxaa uu bogaadiyay sida ay dawlada federaalka u maaraysay qaabdhismeeka iyo howsha shaqo ee Howl Galka Midowga Afrika ee AUSSOM.

b.Golaha ayaa sidoo kale bogaadiyey habsami u socodka howlaha diwaangalinta dadweynaha ee ka bilaabatay Gobolka Banaadir. Waxa uuna ku dhiirigaliyey inay gaarsiyaan degaanada dowlad goboleedyada dalka.

### 3. Go'aamada Shirka

GWQ waxa uu si qoto-dheer u falanqeeyay xaaladaha amniga, siyaasadda, iyo bini aadanimo ee dalku ku suganyahay, wuxuuna ku heshiiyay qodobada soo socda:

1. Goluhu waxa uu isla qaatay inay lagama maarmaan tahay in laga wada qayb-qaato la dagaalanka argagixisada lana garab istaago ciidamada qaranka.
2. Goluhu waxa uu adkeeyay inay lagama maarmaan tahay in la ixtiraamo hay'adaha dastuuriga ah ee dalka taas oo aas-aas u ah hanaanka dawaladnimo ee dadka Soomaaliyeed hiigsanayaan kuna qotoma dastuurka dalka.
3. Goluhu waxa uu isku raacay in maamul-goboleedyadu ay gudiga doorashada kala shaqeeyaan dardargelinta iyo baahinta diiwaangalinta dadwaynaha si loo hirgaliyo doorasho xor iyo xalaal ah.
4. Goluhu waxa uu soo dhaweeyay hannaanka xisbiyada badan ee Dalka kahirgalay, wuxuuna u hambalyeeyay xisbiyada is diiwaangeliyay, sidoo kalena wuxuu ugu baaqay dhammaan kooxaha daneeya siyaasadda iney diiwaan gashadaan ururro siyaasadeed matala afkaartooda.
5. GWQ isaga oo ka duulaya baaqii madaxweynaha ee maalintii ciidda aheyd (29 Maarso 2025), waxa uu isku raacay in Dawlada Federaalka iyo Dawlad-goboleedyada ay dardar galiyaan wadatashiga siyaasiyiinta iyo waxgaradka dalka si loogu midoobo la dagaalanka argagixisada, dimuqraadiyadeynta iyo dib-u-dhiska dalka.
6. GWQ waxa uu isku raacay in wasaarada Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta ay keento talo iyo soo jeedin xaalada Maamul Goboleedka Jubaland si waafaqsan dastuurka iyo sharciyada kale ee dalka, si loo helo nidaam dawlad Goboleed oo sharci ah.
7. Goluhu waxa uu u isla aqoonsaday in SSC-Khaatumo ay tahay xubin ka mid ah dowladaha xubinta ka ah DFS, laguna soo dhammaystiro shirweynaha loo ballansan yahay iyada oo la raacayo dastuurka dalka.

8. Goluhu waxaa uu Dowladda federaalka u soo jeediyay in Wasaarada Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta iyo SSC-Khaatumo iska kaashadaan qabashada shirweynaha iyo dhammaystirka SSC-Khaatumo.

9. Goluhu waxa uu isku raacay in DFS iyo maamul goboleedyada ay si dhow uga wada shaqeeyaan duruufaha bini-aadanimo ee adag ee ka dhashay isbedelka cimilada iyo dagaalada argagaxisada si looga gudbo duruufaha adag ee shacabka Soomaaliyeed ku nool yihiin.

10. Goluhu waxa uu ku bogaadiyay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya soo dhameystirka Qorshaha Isbedelka Qaranka, waxa uuna ugu baaqay dhamaan beesha caalamka, maalgashatada iyo ganacsatada iney mudnaan siiyaan mashaariicda horumarinta qaranka ee wax looga badalayo kobaca dhaqaalaha, shaqa abuurka iyo soo jiidashada maalgashiga caalamiga ah.

**Saxiixayaasha war-murtiyeedka**

Mudane Xamza Cabdi Barre

Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda XFS ____

Mudane Saalax Axmed Jaamac

Ra'iisul Wasaare K/xigeenka XFS ____

Mudane Cabdicasiis Xasan Maxamed (Laftagareen)

Madaxweynaha Dowladda Koonfur Galbeed Soomaaliya ____

Mudane Axmed Cabdi Kaariye (Qoorqoor)

Madaxweynaha Dowladda Galmudug Soomaaliya. ____

Mudane Cali Cabdullaahi Xuseen (Cali Guudlaawe)

Madaxweynaha Dowladda Hirshabeelle Soomaaliya ____

Mudane Maxamed Axmed Amiir

Guddoomiyaha G/Banaadir ahna duqa Muqdisho ____

Mudane Cabdiqaadir Axmed Aw-cali

Hogaamiyaha Dowlad Gobaleedka SSC-Khaatumo. ____

3

## *5. War-murtiyeedka Safarka Xukuumadda JFS ee SSC-Khaatumo*

**WAR-MURTIYEED**
**SAFARKA XUKUUMADDA JFS EE SSC-KHAATUMO**

12-15 April 2025

***Horudhac***

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya **Mudane Xamsa Cabdi Barre**, iyo wafdi uu hogaaminaayo, ayaa 12kii - 15kii April 2025 booqasho taariikhi ah ku tagay Magaalada Laascaanood ee Caasimadda Maamulka SSC-Khaatumo, booqashadan ayaa looga gollahaa xoojinta Nabadda, Midnimada iyo wadajirka ummadda Soomaaliyeed.

Ra'iisul Wasaaraha iyo wafdigiisu intii uu joogay Magaalada Laascaanood wuxuu kulammo kala duwan la yeeshay Hoggaamiyaha Maamulka SSC-Khaatumo, **Mudane Cabdiqaadir Axmed Aw-Cali (Firdhiye)**, Golaha wakiillada, Isimadda Dhaqanka, Culimada, Aqoonyahanka, Haweenka, Dhallinyarada, Ganacsatada iyo qeybaha kala duwan ee Bulshada, waxayna isla qaadaa dhigeen xaaladda deegaanka SSC-Khaatumo.

***Mahadcelin & Bogaadin***

Ra'iisul Wasaaruhu waxa uu uga mahadceliyay Maamulka iyo Shacabka SSC-Khaatumo soo dhaweyntii qiimaha badnayd ee ay u sameeyeen Ra'iisul Wasaaraha iyo Wafdigiisa, Waxa uu bogaadiyay sida ay reer SSC-Khaatumo uga go'antahay ka shaqeynta Nabadda iyo Midnimada Qaranka Soomaaliyeed, Islamarkaana waxa uu soo dhaweeyay sida Mugga iyo milgaha leh ee ay Maamulka, Shacabka iyo Ciidammada SSC-Khaatumo uga go'antahay ilaalinta Nabadda iyo u adeegidda bulshada.

**Qodobadda ka soo baxay Shirarkii Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulka SSC-Khaatumo:**

1. ***Arrimaha Amniga***

Maamulka iyo shacabka SSC-Khaatumo waxay si buuxda u taageereen Dagaalka Dowladda iyo shacabka Soomaaliyeed kula jiraan Khawaarijta Alshabaab iyo Daacish.

Xukuumadda JFS waxa ay bogaadisay amniga, xasilloonida iyo kaladanbaynta ka jirta deegaannada Maamulka SSC-Khaatumo.

Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulka SSC-Khaatumo waxa ay ku heshiiyeen in ay iska kaashadaan arrimaha dib u habaynta iyo horumarinta ciidanka SSC-Khaatumo, iyadoo la waafajinayo hannaanka amniga Qaranka (National Security Architecture).

### 2. *Arrimaha Siyaasadda*

Maamulka SSC-Khaatumo waxa uu taageeray barnaamijka Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo dadaallada Xukuumadda Dan-Qaran ee Dowlad-dhiska, Horumarinta, Nabadda, Midnimada Dalka, Dimoqraadiyaynta iyo Xaqiijinta Xaqa Muwaadinka.

Maamulka SSC-Khaatumo waxa uu taageeray gogosha Nabadeed ee uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya **Dr. Xasan Sheekh Maxamuud** uu fidiyay, waxayna SSC-Khaatumo diyaar u tahay in ay ka qeyb-qaadato Gogoshaas.

### 3. *Xoojinta Nabadda iyo Midnimada Ummadda*

Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo maamulka SSC-Khaatumo waxa ay isla garteen in ay si wadajir ah uga shaqeeyaan xoojinta nabadda iyo midnimada ummadda Soomaaliyeed.

### 4. *Aqoonsiga Maamulka SSC-Khaatumo*

Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyada oo tixraacaysa go'aankii 6dii February 2023 ee Isimada Dhaqanka iyo Waxgaradka SSC-Khaatumo, go'aankii ay DFS ugu aqoonsatay Maamul Kumeel gaar ah 19kii Oktoobar 2023, waxa ay u kuur gashay arrimaha dib u dhiska maamulka SSC-Khaatumo, iyo wadajirka dadkeeda, ka dib markii ay xaqiijiyeen ka go'anaanshaha dadka reer SSC–Khaatumo ee dhismaha hay'adaha Dowladdnimada, Isla markaana si faah-faahsan loo darsay horumarka laga sameeyay dhammaystirka dastuurka iyo u diyaar garawga shirka guud ee SSC-Khaatumo, **waxa ayna xukuumaddu go'aansatay;**
B) In DFS, Maamulka SSC-Khaatumo u aqoonsatay Dowlad Goboleed, laguna dhameystiro shirweynaha iyo heshiiska bulsho (Dastuurka)

T) In maamulka SSC-Khaatumo xubin buuxda ka noqdo Golaha wadatashiga Qaranka (NCC).

J) In deegaanada maamulka SSC-Khaatumo ay yihiin deegaano kamid ah DFS, looguna yeeri karin deegaano lagu muransan yahay (disputed area). Waana in Hay'adaha DFS, Kuwa aan Dowliga ahayn iyo saaxiibadda Soomaaliya uga howlgalaan SSC-Khaatumo si lamid ah sida ay deegaannada kale ee Soomaaliya uga howlgalaan.

### 5. *Hirgalinta Mashaariicda horumarineed*

Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulka SSC-Khaatumo waxa ay si wada jir ah uga wada shaqayn doonaan hirgalinta mashaariic horumarineed oo wax ka badali doona nolosha dadka reer SSC-Khaatumo.

### 6. *Arrimaha Maxaabiista*

Iyada oo la tixgalinaayo Barnaamijka Nabadeynta ee uu garwadeenka ka yahay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, ayuu Maamulka SSC-Khaatumo oo la tashaday Golayaasha Maamulka ku wareejiyay Dowladda Federaalka Soomaaliya 25 maxbuus oo kamid ah maxaabiistii lagu qabtay dagaalkii Somaliland iyo dadka reer SSC-Khaatumo, kuwaas oo leh duruufo gaar ah, waxayna DFS dib-ugu-celin doontaa ehelkoodii iyaga oo badqaba.

### *Gunaanad*

Maamulka SSC-Khaatumo waxa uu u mahadcelinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Ra'iisal Wasaaraha, Xukuumadda JFS taageerada iyo garab istaagga shacabka iyo Maamulka SSC-Khaatumo.

Booqashada Ra'iisul Wasaaraha oo ahayd middii u horraysay ee uu RW Soomaaliyeed ku yimaaddo Magaalada Laascaanood ayaa ku soo gaba-gabawday farxad, nabad, iyo midnimo. Waxa uuna RW hu ku booriyey ummadda Soomaaliyeed in ay gacmaha is qabsadaan, ka shaqeeyaan amniga, horumarinta iyo midnimada.

**Wabillahi Tawfiiq**.

## *6. Foomka Diiwaangelinta Ergada*

**GUDDIGA FARSAMO EE**
**DHAMEYSTIRKA MAAMUL-DHISKA**
**DOWLAD GOBOLEEDKA SSC-KHATUMO**

**FOOM: B/GFDMD/SSC/XXX**

**Taariikh**: XX Luulyo 2025

**Goobta**: Hotel Jidbaale, Laascaanood.

### FOOMKA DIIWAANGELINTA ERGADA

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **XOGAHA SHAKHSIGA AH EE ERGAYGA** | | | | |
| Magaca oo afaran | | | | |
| Magaca hooyada | | | | |
| Taariikhda dhalashada | Maalinta: | Bil: | Sannad: | |
| Goobta dhalashada | | | | |
| Heerka aqoonta | | | | |
| Nooca aqoonsiga | | | | |
| **XOGTA BEESHA/QABIILKA UU MATALAYO** | | | | |
| Magaca qabiilka/beesha | | | | |
| Isimka/caaqilka soo xulay | | Habka hubinta | | |
| Gobolka iyo degmooyinka ay qabiilku degaan | | | | |
| **XOGTA XIRIIRKA** | | | | |
| Degaanka uu deggany ahay | | Teleefanka gacanta | | |
| Email (haddii uu jiro) | | | | |

Aniga oo ..................................... ah waxaan si rasmi ah oo masuuliyad leh u caddeynayaa in dhammaan xogta aan ku buuxiyay foomkan ay ahay mid sax ah, aan marin habaabin lahayn, oo anigu aan leeyahay.

**Saxiix/ama suul:**_____________

**Guddiga Farsamada:** Magaca Xubinta Guddiga ee ka qabatay:

**Saxiix:**_____________

## *7. Foomka Diiwaangelinta Xubinnimada Golaha Wakiilada*

**GUDDIGA HUBINTA IYO ANSIXINTA XUBNAHA GOLAHA WAKIILADA**
**DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI EE SOOMAALIYA**

**FOOMKA DIIWAAN GALINTA XUBINIMADA GOLAHA WAKIILADA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI EE SOOMAALIYA 2025-2030**

**Tariikh ----/----/----** **Tixraac L.R --------------------**

**Magaca XUBINTA:** ……………………………………………………………………………………………………………

Jinsiga:……………… Taariikhda Dhalashada………………… Goobta Dhalashada ……………………… Lambarka Kaarka Aqoonsiga:……………….. ………. Qabiilka:…………………………… …….Jufada/Jilibka: ………………………

Degmada uu matalo: ……………………………..Dowlad Goboleedka: ……………………………………………

Magaalada: ……………………………

**Nooca Hubinta:**

Saxiixa Isimada/Cuqaasha/Wakiilada. Haa:☐ Maya:☐

Isimka Guud. Haa:☐ Maya:☐

CV:☐ Sawiro:☐ Warqadda lacag bixinta:☐ Kaarka Aqoonsiga Qaranka:☐ Warqadda danbi la'aanta:☐

**Faahfaahinta:**
……………………………………………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………………………………………
……………………………………………………………………………………………………………………………

Aniga oo ah________________________________________________, waxaan si rasmi ah oo masuuliyad leh u caddeynayaa in aan hubiyay dhammaan shuruudihii laga rabay xubinta kor ku xusan oo ay tahay mid sax ah isla markaana aysan jirin wax khilaaf ah ama cabasho oo ka timid beesha iska leh kursiga ama beelaha wadaaga.

**Saxiixa hubiyaha**:______________. Taariikh: / /

**Saxiixa Guddoomiya Guddiga:** ___________________ Taariikh: / /

**Stamp:**

Guddiga Hubinta iyo Ansixinta Xubnaha Wakiilada Dowlad Goboleedka Waqooyi Bari ee Soomaaliya

## *8. Foomka Dacwada Gudbinta Doorasha Woqooyi Bari Soomaaliya*

**GUDDIGA HUBINTA IYO ANSIXINTA XUBNAHA GOLAHA WAKIILADA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI EE SOOMAALIYA**

**FOOMKA DACWAD GUDBINTA DOORASHADA 2025 - 2030.**

**Gal Lr: ................................**

**Taariikh..............................**

| HABRAACA TAXANAHA | | FAAHFAAHINTA |
|---|---|---|
| 1. | Magaca Dacwoodaha oo Afaran | ........................................................................................................................................................ <br><br> Murashax Xildhibaan: ☐, Odey Dhaqameed. ☐. |
| 2. | Dacwo Lr. | |
| 3. | Taariikhda Cabashada la qabtay | |
| 4. | Dowlad Goboleedka & Magaalada | |

**<u>ISTICMAALKA XUBIN GUDDIGA OO KALIYA:</u>**

............................................................................................................................................................................

........................... ..............................................................................................................................................

............................................................................................................................................................................

Magaca Xubin Guddiga:________________________. Saxiix Xubinta Guddigaa ____________________________

Magaca Xubin Guddiga: ________________________. Saxiix Xubinta Guddigaa ____________________________

Stamp

*FG: Foomkan waxaa la siinayaa oo kaliya qofka dacwoonaya, wuxayna muujinaysaa in uu gudbistatay cabasho rasmi ah*

**GUDDIGA HUBINTA IYO ANSIXINTA XUBNAHA GOLAHA WAKIILADA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI EE SOOMAALIYA**

**FOOMKA DACWAD GUDBINTA DOORASHADA 2025 - 2030.**

**Gal Lr: ................................**

**Taariikh...............................**

| HABRAACA TAXANAHA | | FAAHFAAHINTA |
|---|---|---|
| 1. | Magaca Dacwoodaha oo Afaran | .................................................................................................................. Murashax Xildhibaan: ☐, Odey Dhaqameed. ☐. |
| 2. | Dacwo Lr. | |
| 3. | Taariikhda Cabashada la qabtay | |
| 4. | Dowlad Goboleedka & Magaalada | |
| **ISTICMAALKA XUBIN GUDDIGA OO KALIYA:** ............................................................................................................ ............................ ............................................................................................................ ............................................................................................................ | | |

Magaca Xubin Guddiga:________________________________. Saxiix Xubinta Guddigaa ______________________________________

Magaca Xubin Guddiga: ________________________________. Saxiix Xubinta Guddigaa ______________________________________

Stamp

*FG: Foomkan waxaa la siinayaa oo kaliya qofka dacwoonaya, wuxayna muujinaysaa in uu gudbistatay cabasho rasmi ah*

## 9. Foomka Go'aan Gaarista ee Xalinta Khilaafaadka Doorashada

**GUDDIGA HUBINTA IYO ANSIXINTA XUBNAHA GOLAHA WAKIILADA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI EE SOOMAALIYA**

**DOORASHADA 2025-2030**

**FOOMKA GO'AAN GAARIDA - EDRC DECISION FORM**

*FOOMKAN WAXA UU CADEYNAYAA GO'AANKA KAMA DANBAYSTA AH EE AY GAAREEN*

*GUDDIGA XALLINTA KHILAAFAADKA DOORASHOOYINKA DADBAN EE 2020/ 2021*

*Tixraac..........................* *Gal Lambar.................................* *Kursi Reerka/Beesha.........................................*

| | |
|---|---|
| *Magaca Dacwoodaha: ...........................................................* | *Dacwad ka timid: (Musharax / Dhaqan)* |
| *Taariikhda la qabtay: .........* | *Tirada loogu codeeyay Go'aanka:___________________* |
| *Waxaa dacwadan laga soo xareeyay dowlad goboleedka: .........................................* | |
| *Magaalada .......................................* *Nooca Dacwada: ..........................................* | *Taariikhda go'aanka la gaaray:* ........................................................... |
| *Tirada dhagaysiga dacwadan :.................* *Nooca Cadaymaha :....................................* | |

Sababeynta go'aanka oo faahfaahsan:.......................................................................................................................................................................

.......................................................................................................................................................................................................................

.......................................................................................................................................................................................................................

Saxiixa Guddoomiyaha Guddiga ....................................................................... Shaabad

## GUDDIGA HUBINTA IYO ANSIXINTA XUBNAHA GOLAHA WAKIILADA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI EE SOOMAALIYA

## DOORASHADA 2025-2030

## FOOMKA DALBASHADA RACFAANKA DACWOODAHA

## EDRC APPEAL FORM

**Taariikh............ Gal Lr........... Tixraac Lr...................**

***FOOMKAN WUXUU CADAYNAYAA IN DACWOODUHU UU RACFAAN U QAATAY GOLAHA SARRE EE SIYAASADDA, KA DIB MARKUU KU QANCI WAAYAY GO'AANKA AY GAAREEN XUBNAHA GUDDIGA HUBINTA IYO ANSIXINTA GOLAHA WAKIILADDA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI EE SOOMAALIYA.***

| | |
|---|---|
| *Magaca Dacwoodaha: ............................................................ Tell..................................* | *Ma soo martay habraacyadii dacwadaha..... Maya.......... Haa...........* |
| *Email...................................................... Nooca Aqqonsiga...............................* | *Ma la sameeyay baaritaano ku filan............Maya............ Haa...........* |
| *Numberka kaarka Aqoonsiga......................... Taariikhda dacwadda la qabtay: ............................* | *Ma la mariyay dhageesiga dhinacyada ay dacwadu khusayso: Maya............ Haa...........* |
| *Dowlad goboleedka......................... Magaalada ...........................................* | *Taariikhda go'aanka laga gaaray dacwada .............................................* |
| *Reerka: .................................. Nooca dacwoodaha ..................................................* | |

**SABABTA UU DACWOODUHU U QAATAY RACFAANKA**

..........................................................................................................................................................................................

..........................................................................................................................................................................................

**Anigoo ah ....................................................................... waxaan halkan ku cadaynayaa inaan racfaan u qaatay golaha sarre ee siyaasadda ka dib markaan ku qanci waayay go'aanka ay gaareen guddiga hubinta iyo ansixinta golaha wakiiladda dowlad goboleedka Waqooyi Barri ee Soomaaliya**

**Saxiixa Dacwoodaha..................................................................**

**U GAAR AH ISTICMAALKA Golaha Sarre ee Siyaasadda**

..........................................................................................................................................................................................

..........................................................................................................................................................................................

**SAXIIXAYAASHA WAKIILKA GSS-------------------------------------------------------------------------------**

## *10. Foomka Diiwaangelinta Xildhibaanka*

**GUDDIGA FARSAMO EE DHAMEYSTIRKA MAAMUL-DHISKA DOWLAD GOBOLEEDKA WAQOOYI BARI**

**FOOM: GW/WB/01**

**Taariikh**: 10 Agoosto 2025

**Goobta**: Hotel Jidbaale, Laascaanood.

### FOOMKA DIIWAANGELINTA XILDHIBAANKA

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| **XOGAHA SHAKHSIGA AH EE XILDHIBAANKA** | | | | |
| Magaca oo afaran | XX | | | |
| Magaca hooyada | | | | |
| Taariikhda dhalashada | Maalinta: | Bil: | Sannad: | |
| Goobta dhalashada | | | | |
| Heerka aqoonta | | | Jinsiga lab | |
| Nooca aqoonsiga | | Lambarka aqoonsiga | | |
| **XOGTA BEESHA/QABIILKA UU MATALAYO** | | | | |
| Magaca qabiilka/beesha | | Magaca jifida hoose | | |
| Isimka/caaqilka soo xulay | | Habka hubinta | | |
| Gobolka iyo degmooyinka uu matalo | | | | |
| **XOGTA XIRIIRKA** | | | | |
| Degaanka uu deggan yahay | | Teleefanka gacanta | | |
| Email (haddii uu jiro) | | | | |

Aniga oo XXXXX XXXXX XXXXXXX ah, waxaan si rasmi ah oo masuuliyad leh u caddeynayaa in dhammaan xogta aan ku buuxiyay foomkan ay tahay mid sax ah, aan marin habaabin lahayn, oo anigu aan leeyahay. **Saxiix/ama suul**:____________

**Guddiga Farsamada:**

Magaca Xubinta Guddiga ee ka qabatay: **Saxiix**:____________

XXX XXX XXXX

## *11. Soo Jeedin CUTUBKA .... QODOBBADA XILLIGA KALAGUURKA AH*

**Qod. ....Ujeeddada guud ee Cutubkaan**

1. Xilliga kala guurku waa muddada u dhaxeysa marka ergadu ansixiso Dastuurkan ilaa laga gaarayo marka hay'adaha uu Dastuurku tilmaamayo in si toos ah loo soo doorto, lagu soo soo doorto qof iyo cod taas oo noqonaysa dhammaystirka dhaqangelinta Dastuurka iyo dhammaadka kala guurka.
2. Inta lagu jiro muddada kala guurka waxaa lagu sii dhaqmayaa habka awood qaybsiga beelaha ee lagu heshiiyay iyadoo la waafajinayo mabaadi'da guud ee Dastuurka oo ay ka mid yihiin:-
    a. Ilaalinta Xuquuqda Aadanaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee muwaadiniinta;
    b. Ka qaybgelin wax-ku-ool ah ee dhammaan qaybaha bulshada sida haweenka (30% laga siiyo jagooyinka laysu doorto iyo kuwa laysu magacaabo ee laamaha dowladda), dhallinyarada, culumada, bulshooyinka la haybsooco, iyo kuwa laga tirada badanyahay.
    c. Dhowrista talinta sharciga iyo in dhammaan dadku u siman yihiin sharciga hortiisa;
    d. Xukuumad loo dhan yahay oo ku dhisan wadatashi, Caddaalad iyo isu dheellitirka awoodaha xeer-dejinta, fulinta iyo garsoorka madaxbannaan;
3. Muddada lagu dhaqmayo habka Ku-meel-gaarka ah ee awood-qaybsiga beelaha ee hay'adaha sida tooska ah loo soo doorto (goleyaasha degaanka ee degmooyinka, golaha wakiillada, Madaxweynaha iyo Madaxweyne kuxigeenka) ee lagu jiro muddada kala guurka, dowladdu waa in ay masuuliyad buuxda iska saarto diyaarinta doorasho qof iyo cod ah si dhammaan xubnaha hay'adahaas dowladeed loogu soo doorto si dimoqraadi ah oo qof iyo cod ah:-
    a. Diyaarinta dhammaan shuruucda iyo hay'adaha doorashooyinka, sida guddiga doorashooyinka madax-bannaan, xeerarka diiwaangelinta codbixiyeyaasha iyo xeerarka doorashada;
    b. Diyaarinya qalabka iyo dhaqaalaha lagama maarmaanka u ah qabashada doorashooyinka;
    c. U diyaarinta jawi suuragelinaya doorasho qof iyo cod ah oo la diiwaangeliyo codbixiyayaasha iyo ururrada siyaasadda;
    d. Wacyigelinta bulshada iyo howlgelinta shaqaalaha doorashooyinka, si loo xaqiijiyo in shacabka degaanka ay si buuxda uga qayb qaataan nidaamka doorashooyinka.

**Qodobka....Habka xulista goleyaasha degaanka iyo maammullada degmooyinka Muddada Kala Guurka**

1. Goleyaasha degaanka ee degmooyinka waxaa lagu dhisayaaa muddada kala guurka iyadoo la adeegsanaayo hab awood-qaybsi beelaha wada dega degaanka, illaa laga hirgelinayo doorasho qof iyo cod ah.
2. Habka soo xulista Goleyaasha degaanka ee degmooyinka waxaa saldhig u noqonaya wadahadal iyo wada xaajood ay yeeshaan beelaha degmada wada deggan waxaana la tixgelinayaa isu dheellitirka beelaha, kaqaybgal buuxa ee haweenka ugu yaraan 30%, dhallinyarada, iyo matalaadda beelaha la hayb sooco, iyo kuwa laga tirada badan yahay.
3. Faahfaahinta nidaamka soo xulista goleyaasha degaanka, iyo doorashada guddoomiyeyaasha, guddoomiye ku-xigeennada iyo guddiyada maamulka waxaa lagu qeexi doonaa sharci gaar ah oo uu ansixiyo Golaha Wakiilladu. Sharcigaas ayaa lagu qeexi doonaa:-

a. Tirada xubnaha Golaha Degaanka ee degmo kasta;
b. Habka soo xulista goleyaasha degaanka ee muddada kala guurka;
c. Shuruudaha musharraxiinta iyo xubnaha golaha degaanka;
d. Habka doorashada guddoomiyayaasha, guddoomiye kuxigeennada iyo dhismaha guddiyada maamulka degmooyinka;
e. Habka adeeg bixinta maamullada degmooyinka;
f. Habraaca xallinta khilaafaadka doorashooyinka;
g. Iyo wixii kaloo muhiim u ah shaqada maamullada degmooyinka.

**Qodobka.....Habka Xulista Golaha Wakiillada Muddada Kala Guurka**

1. Inta lagu jiro muddada kala guurka, xubnaha Golaha Wakiillada waxaa lagu soo xulayaa hab awood-qaybsi beeleed oo ay qabiillada wada dega degaannada Dowlad-goboleedku isku raacsan yihiin, iyadoo la xaqiijinayo:
   - Matalaad loo dhanyahay ee dhammaan beelaha wada dega degaanka;
   - Ka qaybgal wax-ku-ool ah ee haweenka (ugu yaraan 30% kuraasta);
   - Ka qaybgalka beelaha la hayb sooco, iyo beelaha laga tira badan yahay, iyo dhallinyarada.
2. Isimada iyo Cuqaasha beel kasta waxay soo magacaabayaan xubnaha matalaya kuraasta ay beeshoodu ku leedahay Golaha Wakiillada sida lagu heshiiyay, iyadoo la tixgelinayo isu dheellitirka beesha wax wada leh dhexdeeda.
3. Liiska xubnaha beeluhu soo magacaabaan waxaa hubinaya oo ansixinaya Guddi kumeelgaar ah oo ka madax-bannaan beelaha wax qaybsanaya.

**Qodobka....Habka Doorashada Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka ee Muddada kala guurka**

1. Muddada kala guurka, Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka waxaa dooranaya Golaha Wakiillada Dowlad-goboleedka iyo xil waliba goonidiisa loogu tartamayo.
2. Murashixiinta Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka waa in ay buuxiyaan shuruudaha uu Dastuurkani uu dhigayo isla markaana, Murashax kasta waa inuu qoraalkiisa murashaxnimo oo ay oggolaadeen ugu yaraan 10 xubnaha Golaha Wakiillada oo uu ku lifaaqan yahay barnaamijkiisa siyaasadeed u soo gudbiyaa Golaha Wakiillada doorashada ka hor.
3. Golaha Wakiillada ayaa xaq u leh in uu dhageysto barnaamijyada murashaxiinta ka hor inta aan la billaabin codbixinta.
4. Golaha Wakiilladu wuxuu murashaxiinta ugu codaynayaan si qarsoodi ah, habkaan soo socda:-
   a. Wareegga koowaad, Murashaxa Madaxweyne ama Madaxweyne kuxigeen ee hela codadka saddex meelood laba (2/3) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada ayaa ku guuleysanaya xilka Madaxweynaha ama Madaxweynka.
   b. Haddii, wareegga koowaad, murashaxna uusan helin aqlabiyadda codadka saddex meelood laba (2/3) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada, waxaa la aadayaa wareeg labaad waxaana ku tartamaya afarta murashax ee ugu codka badan wareegga koowaad, iyadoo uu xilka Madaxweynaha ama Madaxweyne kuxigeenka ku guuleysanayo murashaxa hela codadka saddex meelood laba (2/3) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada.
   c. Haddii, wareegga labaad, murashaxna uusan helin codadka saddex meelood laba (2/3) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada, waxaa la aadayaa wareeg

saddexaad waxaana ku tartamaya labada murashax ee ugu codka badan wareegga labaad, iyadoo uu xilka Madaxweynaha ama Madaxweyne kuxigeenka ku guuleysanayo murashaxa hela codadka ugu badan ee tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada.

5. Haddii murrashixiinta Madaxweyne ama Madaxweyne ay ka yaryihiin tirada sare lagu cayimay ama qaarkood ay ka tanaasulaan murashaxnimada waxaa toos loogu gudbayaa wareegga labaad ama saddexaad iyadoo la eegayo tirada murashixiinta.
6. Haddii xilka Madaxweyne ama Madaxweyne uu isu soo taago hal murashax oo keliya waxaa loo qaadayaa aftida xubnaha Golaha Wakiillada isaga ayaana ku guuleeysanaya xilka marka laga reebo haddii aqlabiyadda codadka kala bar lagu darat hal (50%+1) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Wakiillada aysan diidin murashaxnimadiisa taasoo khasbaysa in doorashada muddo gaaban dib loo dhigo.

**Qodobka....Meertada Xilalka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka ee muddada kala guurka**

1. Xilalka Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka waxaa, inta lagu jiro muddada kala guurka, lagu saleeynayaa meerto kaltan beeleed, si loo hubiyo matalaad iyo isku dheellitir bulsho:

   - Meertada 1aad: Haddii Madaxweynaha uu ku guuleeysto murashax ka soo jeedo beelaha Sool ama Sanaag, Madaxweyne Ku-xigeenka waxaa ku tartamaya murashixiinta ka soo jeeda beesha Madaxweynaha noqotay maahine beesha kale ee Sool ama Sanaag;
   - Meertada 2aad: Haddii wali lagu jiro muddada kala guurka, xilka Madaxweynaha ee muddo xileedka labaad wuxuu u wareeggayaa oo ku tartamaya murashixiinta ka soo jeeda beelaha Sanaag ama Sool ee meertadii hore waayay jagadaas, halka murashixiinta beelaha kale ay ku tartamayaan jagada Madaxweyne Ku-xigeenka.

2. Habkaan ku saleysan meertada beelaha waa ku-meel-gaar waana inta lagu jiro muddada kala guurka, waxayna meesha ka bixi doontaa marka la hirgeliyo doorasho qof iyo cod ah oo loo dhanyahay.

**Qodobka ... Xaaladda Axdigii SSC-Khaatumo iyo sharciyada kale**

1. Marka uu Dastuurkan dhaqangalo, waxaa la baabi'iyay Axdiga Maamulka Ku-meelgaarka ah ee SSC-Khaatumo iyo dhammaan dastuurro, xeer dastuureedyo, ama sharciyada kale oo horey uga jiray degaannada Sanaag, Sool, iyo Cayn, ee aan waafaqsanayn Dastuurkan.
2. Sharci kasta ee horey dhaqangal u ahaa oo aan si toos ah uga hor imaanayn Dastuurkan waa lagu sii dhaqmayaa ilaa iyo inta laga soo saarayo bedelkooda, sharciyo cusub oo waafaqsan Dastuurkan.
3. Golaha Wakiillada ayaa xeer ku soo saaraya oo hagaya dib-u-eegista iyo waafajinta sharciyadii hore, si loo hubiyo in dhammaan xeerarka dhaqangalka ah iyo hay'adaha dowladeed waafajinayo Dastuurkan.

## *12. Lifaaqa Faqradaha kaabista qodobka ansixinta dastuurka*

1. Qaadashada Dastuurkan waxay si rasmi ah ku ansaxaysaa marka uu Shirweynaha ergada oo ka kooban afar boqol iyo laba iyo soddon (432) xubnood ay ku oggolaadaan aqlabiyad ugu yaraan saddex meelood laba meel (2/3) ee tirada guud ee ergadu.

2. Xubnaha ergada ansixinaysa dastuurkan waxaa soo xulaya isimada iyo cuqaasha degaannada Dowlad-goboleedka, waxaana lagu soo xulayaa hab lagu xaqiijinayo matalaadda dhammaan qaybaha bulshada iyadoo la raacayo qoondada beelaha ee lagu heshiiyay.

3. Guddiga Farsamada ee Dowladda Federaalka ayaa marka loo codeynayo Dastuurka hubinaya guntanka (kooramka) ergada iyo saxsanaanta tirinta codadka, shir-guddoonka Shirweynaha ergada ayaana ku dhawaaqaya natiijada kama dambaysta ah ee codbixinta.



